


# UCID

Xisbiga Caddaalada iyo Daryeelka JSL


حزب العداله والرأفه

***We Stand For Change and Justice***

# UCID Political Platform

***Qorshaha Waxqabad ee X/UCID***

***Ku hagi doono dalka InshaAll***




***UCID***

***Political platform through which we shall rule Somaliland nation***

# QORSHAHA WAXQABAD EE X/UCID

**Diinta, Dadka, Dalka, iyo Danta-guud UCID baa u cid ah**

**(U Hiili Mustaqbalkaaga oo nagu dooro Waxqabad, Daacadnimo Iyo Shareecadda Islaamka oonu Hirgalin doono)**

# Barnaamijka Siyaasadeed ee Xisbiga UCID, 2009/2010

## (Qorshaha Waxqabad ee Xisbiga UCID)
## (UCID Political Platform, 2009/2010)



Midig. Maxamed-Rashid Sh. Xasan-musharaxa m/weyne xigeen, Faysal Cali Warabe-musharaxa madaxweyne iyo Aadam M. Mire Waqaf-guddoomiyaha olalaha ee xisbiga UCID.

**“Cadawga Dalkeenu waa Musuqmaasuq, Caddaalad darro, Qabyaalad, Shaqo la’aan iyo Addeeg bulsho la’aan, si aynu uga baxno dhibaatooyinkaas muwaadin codkaaga ugu hiili oo sii Xisbiga UCID”**

**“The enemy of our country is corruption, injustice, clanism, umemployment and lack of leadership. A vote for UCID means we can start tackling these issues”**

**“Waxaanu u taaganahay Isbeddel togan iyo Caddaalad”**
***“We stand for Change and Justice”***
***©UCID 2010***

**TUSMO**


| **Qoddobada Barnaamijka** | **Page #** |
|---|---|
| I. Arr-aar | **5** |
| II. Gogol dhig | **7** |
| III. Hordhac | **10** |
| IV. Xogaha Barnaamijka lagu salleeyey | **11** |
| V. Kaabayaasha Barnaamijka | **11** |
| | |
| **1. MAAMUL-WANAAGA** | **13** |
| **Dhisida dawlad kooban oo tayo leh** | **13** |
| **Dib-u-habeynta hay’adaha xukuumada** | **14** |
| **Abuurista hay’ado dawladeed oo cusub Iyo xoojinta kuwii hore u jirey** | **14** |
| **Ururada bulshadda rayidka ah (Non-state actors)** | **16** |
| **Dib-u-habeynta iyo dhammeystirka qawaaniinta dalka** | **16** |
| | |
| **2. ADKAYNTA NABADDA IYO AMNIGA** | **17** |
| | |
| **3. SUGIDDA CADDAALADA DALKA** | **19** |
| **Maxkamado caddaalad ku dhisan** | **19** |
| **Tayaynta Xafiiska Xeer illaaliyaha Guud** | **21** |
| **Suggida xuquuqda dadka (xuquuqul insaan)** | **21** |
| | |
| **4. TAYEYNTA CIIDAMADA DALKA** | **22** |
| **Ciidanka Qaranka** | **22** |
| **Ciidanka Booliiska** | **23** |
| **Ciidanka Asluubta** | **23** |
| **Ciidanka Sirdoonka iyo Socdaalka** | **23** |
| | |
| **5. KOBCINTA DHAQAALAHA DALKA** | **24** |
| **Kor u qaadista wax-soo-saarka aasaasiga ah (Primary Production)** | **25** |
| **Nidaaminta iyo xoojinta Bangiga dhexe** | **28** |
| **Aasaaska guddida dhaqaalaha** | **29** |
| **Shaqo abuuris** | **29** |
| **Aasaaska sanduuqa sako** | **30** |
| **Tayaynta hay’ada shaqaalaha qaranka** | **30** |

| | |
|---|---|
| La dagaalanka musuqmaasuga | 30 |
| Dib-u-habaynta nidaamka cashuuraha dalka | 31 |
| | |
| 6. ADDEEGA BULSHADA | 32 |
| Horumarinta Caafimaadka | 32 |
| Waxbarashadda | 35 |
| Siyaasadda Biyaha ee Xisbiga UCID | 36 |
| Siyaasadda Korontada ee Xisbiga UCID | 37 |
| Daryeelka Bulshada | 37 |
| | |
| 7. SIYAASADA ARRIMAHA DIBADDA IYO ISKAASHIGA CAALAMIGA AH | 41 |
| | |
| 8. SIYAASADA DEEGAANKA | 42 |
| | |
| 9. SIYAASADA SAXAAFADDA | 44 |
| | |
| 10. 120-KA CISHO EE U HOREEYA WAKHTIGA XUKUUMADA UCID | 45 |
| | |
| 11. GUNAANAD (CONCLUSION) | 47 |

## ARR-AAR

Maadaama wad-tashigu lagama maarmaan u yahay dhismaha tallo kasta oo la go'aamiyo, isla markaana uu yahay aasaaska Distoorka Qaranka JSL, Xisbiga Caddaalada iyo Daryeelka, UCID waxaa uu ku dhiiri-galinayaa muwaadinka sharafta leh ee su'aal cilmiya ama farsamo ka qaba qoraalkan in uu si furan oo saraaxad leh u weydiiyo xisbiga isagoo lasoo xidhiidhaaya xarunta dhexe ama xafiisyada olalaha xisbiga UCID.

Adem M. Mire Waqaf
Guddoomiyaha Olalaha UCID
MOB: +2522-4424479
Email: amwaqaf@hotmail.com,
ucidinfo@yahoo.com

## XAQA DAABACAADA

Qoraalkan “Qorshaha Waxqabad ee Xisbiga UCID” lama dhallan gadiyi karo, nuxurka ku jirana lama kala dhantaali karo… loomana sawiri karo sifo xuquuqda lahaanshaha ka baxsan.
Qoraalkan suggnaanshihiisa iyo rasmiyeyntiisaba waxaa iska leh xarunta xisbiga iyadoo qaybintiisa iyo sharax-ka-bixintiisaba ay hoggaaminyaaan guddida olalaha heer-qaran ee xisbiga UCID. Sidaas daraadeed cidii ku xad-gudubta xuquuqda lahaanshaha qoraalkan waxaa lala tiigsan doonaa qawaaniinta iyo caddaalada dalka.

©
All Rights are reserved
Waxaa la daabacay, Oct, 2009
Xarunta Xisbiga UCID
Guddida Olalaha Heer-qaran

## GOGOL DHIG

Jamhuuriyadda Soomaaliland baaxada dhulkeedu waxa uu dhan yahay 137,600 sq km. Dadka dalka Somaliland waxaa lagu qiyaasaa 3.5million. Somaliland waxay dhacdaa dhul-badheedka xaga woqooyi dhigaha 8 degree ilaa 11.30’Degree, iyo loolka 42.45 galbeedka ilaa loolka 49aad bariga. Somaliland waxay ku taalaa geeska qaarada Afrika iyadoo xad la wadaagta dalalka Djibouti, Ethiopia iyo Somalia iyo dhinaca woqooyi oo Gacanka Cadmeed ee Badda Cas ka xigo. Somaliland waxay ahayd maxmiyad Ingiriis mudadii u dhaxaysay 1884 ilaa 1960kii, iyadoo madaxbanaani taam ah heshey 26kii, June, 1960kii, ka dib markii ay ku hoos jirtey Maxmiyada Ingiriis muddo 75 sannadood ah.

Jamhuuriyadda Somaliland waxay si deg deg ah ula midawdey Somalia oo markaas ka hoos baxday gumeysi talyaani, iyadoo wax shuruud ah aan ku xidhin midawgaas ay galeysey, waxaana waagaas jirey rajo dadka soomaaliyeed ay ka qabeen in la unko dal ay ku midoobaan shanta soomaaliyeed oo saddexda kale yihiin Jabuuti, Kilalka 5aad ee soomaalida Ethiopia iyo gobolada woqooyi ee soomaalida Kenya, sidaas daraadeed ujeedada midawga Somaliland iyo Somalia waxay markaas ahayd mid looga gon lahaa in lagu horseedo midaw dhex mara shanta soomaaliyeed si loo helo jamhuuriyad Somaliweyn oo ay ku dhan yihiin shanta soomaaliyeed ee Geeska Afrika.

Waxaa si deg deg ah u dhicisawday rajadii shanta soomaaliyeed sababtoo ah waxaa arrintaas kasoo horjeestey bulshada caalamka, siiba dalalka Kenya iyo Ethiopia, iyadoo midawgii Somaliland la gashey Somalia noqdey mid aan la mahadin oo lagu hungoobay oo horaantiiba la dareemey dulmi iyo sinaan la’aan saamaysey dadkii reer Somaliland.

Dadka reer Somaliland waxay dareenkooda ku muujiyeen diidmo ay intooda badani kala hortageen aftidii loogu codaynayay dastuurkii midawga ee 1961kii iyo afgambigii isla sannadkaas dhicisoobey ee ay hoggaaminayeen qaar ka mid ah saraakiishii ciidamada iyo aqoonyahanada reer Somaliland.

Markii kaligii-taliye M. S. Barre xukunka ku qabsatey afgambi milateri ayaa ay rajadii dadka reer Somaliland ka qabeen midawgay la galeen Somalia sii yaraatey, halkii taliska Siyaad Barre dalka ku samayn lahaa isbaddel kuna dhiqi lahaa horumarkii ay dadku ka waayeen dawladdii la afgambiyey oo fadhiidnimo ragaadisey, ayaa uu ku kacay amar-ku-

taagleyn, cago-jugleyn iyo cuuryaamin uu ku sameeyey hanaan kasta oo dadweynuhu codkooda iyo dareenkoodaba ku cabiri karaan.

Wixii intaas ka dambeeyey, talisku wuxuu bilaabay inuu laayo aqoonyahanka, culimada, odayaasha iyo waxgaradka umadda, isla markaana uu cidhib tirro dhammaan xorriyadaha muwaadiniintu ay xaqa u lahaayeen, iyadoo culays laxaad leh, cabudhin, burburin, cuuryaamin dhaqaale iyo xasuuqba u gaystey goboladii woqooyi ee dalka (Somaliland), taasina waxay dhalisey in kacdoon shacbi lagaga horyimaado taliskii arxanka darnaa ee gacan-ku-dhiiglaha ahaa.

Dhaq-dhaqaaqii Wadaniga ahaa ee SNM waxaa uu ku dhashey dareenka dadka oo dal iyo dibadba taxnaa, waxaanu ku barbaarey dulmigii aan xadka lahayn ee taliska iyo gilgilashadii waxgaradka iyo guud ahaan dadweynaha.
SNM waxay gaadhey guul laxaad leh, waxaanay si xoog leh tallada kaga fara-maroojisey taliskii 22-sannadood dalka dulmiga ku haysatey.
Dalka Somaliland waxaa uu xorriyadiisii lasoo noqday 1991kii, bishii May, 18keedii, wakhtigaas oo shirweyne ay isugu yimaadeen dhammaan beelaha wada dega gobolada Somaliland magaalada Burco. Waxaana si wada jir ah loo go’aansatey in laga noqdo midawgii aan loo meel dayin ee sida dhakhsaha ah loola galey Somalia, isla markaana dib-loo-dhiso dalka iyadoo wax kasta laga soo bilaabay meel aan waxba jirin oo aanay markaas waxba dhisneyn. Somalilandna wakhtigaa wax taareego ah caalamka kamay helin.
Waxaana SNM ay ku dhiiratey inay xukunka gacanta dadweynaha kusoo celiyaan, muddo laba sannadood ah ka dib.

Waxaa markaas jirtey rajo wanaagsan oo laga qabay in dalka laga hirgalin doono hoggaamin iyo maamul wanaagsan, isla markaasna deg deg looga midho-dhilin doono rajadii dadweynaha, balse nasiib darro waxaa la galay qulqulatooyin siyaasadeed oo ka hor yimid dawladdii SNM hoggaamineysey ee xilkeedu ku eekaa labada sanno.
Waxaana siyaasiyiintii markaan saaxada joogtey ay ku guul daraysteen inay mideeyaan dadka, isla markaana ku dhaqaaqaan siyaasado dalka dib loogu dhisayo, laguna horumarinayo. Kala qaybsanaantii iyo khilaafkii siyaasiyiintu waxa uu keeney in ay dalka ka dhacaan dirir iyo colaado sokeeye sannadihii 1991-1992, 1994-1996.

Caqabadaas kor ku xusani dadka reer Somaliland kamay joojin inay ka midho-dhaliyaan himiladoodii ahayd inay dhistaan qaran lugihiisa isku taaga oo taabo-gal ah, waxaana duruufahaas barbar socday dedaaladii lagu adkeynayey dawladnimada Somaliland, iyadoo 1993kii shir-weynihii Borama lagu ansixiyey axdi qarameed, laguna doortey xukuumad iyo gole baarlamaan oo ku meel gaadh ah, waxaana madaxweyne loo doortey Illaahay (SWT) ha u naxariistee marxuum,

Mudane Max’ed X. I. Cigaal iyo Mudane, C/Raxman Aw Cali Faarax oo madaxweyne xigeen loo doortey.

Ugu dambeyntii shirarkii Burco, Berbera, Borama iyo Hargeysa waxay keeneen maxsuul ah in la unko qaran haykal dawladeed oo dhammeystiran leh, isla markaana qaata hanaanka dawladnimo ee casriga ah iyo nidaamka siyaasadeed ee axsaabta badan iyadoo diinta iyo dhaqankaba tix galintoodii mudnayd la siinayey.

Aasaaska xisbiga Caddaalada iyo Daryeelka UCID, wuxu ka yimid fikrada iyo dedaalada ay sameeyeen qaar ka tirsan aqooyahaniinta Somaliland ee qurbaha ku noolaa iyo in dalka gudihiisaba ku sugneyd. Ujeedada ay ka lahaayeena waxay ahayd in ay ka qayb qaataan dhismaha qaranimada iyo hanaanka dimuqraadiyadeed ee dalka Somaliland, sameeyaana xisbi siyaasadeed furfuran oo ka tarjumaya dareenka dhabta ah ee dadweynaha, ka aragti dheer kana casrisan hanaanka ay siyaasiyiintii muddada badan kusoo jirey saaxadu ay isu habeyn jireen. Eng. Faysal Cali Xuseen oo ka mid ahaa aqoonyahaniinta qurba jooga ah ayaa shirweynihii ururka loogu doortay guddoomiyaha Ururka isagoo qayb weyn kasoo qaatey aasaaska xisbiga iyo nabadeyntii Somaliland.
Xisbiga UCID waxaa uu ahaa ururkii ugu horeeyey ee mucaarad ah ee dalka laga aasaaso, kuna dhiirada toosinta iyo dhaliisha wax dhiska ah (positive critique) ee xukuumadii wakhtigaas.

Laga soo bilaabo wakhtigii la aasaasay xisbiga ee 2001dii ilaa hadda xisbigu wuxuu gaadhay guulo la taaban karo, waxaana guulahaas ka mid ah;

- UCID inay ahayd ururkii ka badbaadiyey dalka JSL, door muhiima oo la taaban karana ka qaatey sidii looga gudbi lahaa qaab-beeleedkii looguna gudbi lahaa nidaamka casriga ah ee dawladnimada ee ku dhisan axsaabta badan.
- In ururka UCID ay u suurto-gashey in uu heer xisbi oo ka mid ah saddexda xisbi qaran usoo gudbo.
- In xisbiga UCID uu ahaa xisbiga kaliya ee ka keena natiijooyin mar walba sii kordhaya doorashooyinkii kala dambeeyey ee dalka ka qabsoomey (Golayaasha Deegaanka, Madaxtooyada iyo Wakiilada), halkii xisbiyada kale ay helayeen natiijooyin aan korodh ka muuqan oo hoos u dhacyo lahaa doorashaba doorashaday ka dambeysey.
- In xisbiga UCID mar walba uu yahay ka kaliya ee horseeda xallinta khilaaf kasta oo siyaasi ah oo dalka ku yimaada, isla markaana horseed ka noqda ka hormarinta danta guud midda gaar ahaaneed.

- In xisbiga UCID yahay mid qayb laxaad leh ka qaata hawlaha daryeelka iyo horumarinta addeegyada bulshada, isla markaasna si gaar ah uga war haya qaybaha bulsho ee jilicsan.
- In xisbiga UCID noqday mid taariikh lama ilaawaan ah ku yeesha arrimaha ictiraaf raadinta iyo xidhiidhka dibada (mid goboleed, qaaradeed iyo caalamiba)
- Waxaa xusid mudan tusaale ahaan, 6-dii qoddob ee saldhiga u ahaa heshiiskan maanta taagan, in xisbiga UCID uu ka qaatey kaalinta koowaad.

Maanta xisbiga UCID, waxa uu u taagan yahay in uu horseed ka noqdo nabada, cadaaladda, horumarka iyo ictiraf-raadinta Jamhuuriyadda Somaliland.

Barnaamijkan uu xisbigu usoo bandhigayo umadda waa mid ka tarjumaya qoddobadan kor ku xusan isla markaana xisbiga UCID ka dhigaya mid ay u cadahay talladii iyo qorshihii uu ku fulin lahaa kagana midho-dhalin lahaa.

## HORDHAC

Xisbiga Caddaalada iyo Daryeelka UCID waxaa la aasaasey 18th August, 2001, iyadoo yoolka laga lahaa ahaa in dalka Somaliland noqdo mid ku guuleysta geediga uu ugu jiro horumarka, caddaalada iyo xasiloonida buuxda.

Xisbiga UCID waxaa uu u taagan yahay hirgalinta isbeddel togan kaas oo majaraha iyo hanaanka siyaasadeed ee JSL ka dhiga mid ku qotoma mabaa'diida diinta Islaamka, isdheelitir (check and balance), xalliibnaan iyo xisaabtan (transparency and accountability) iyo wanaajinta danta guud.

Haddaba xisbiga UCID isagoo ogsoon in waxaa ugu muhiimsan ee xisbiyada badan lagu kala xushaa yihiin barnaamijka iyo siyaasadaha ay u dejiyaan umadda… ayaa uu halkan muwaadiniinta JSL ee sharafta leh ee sida xorta ah u codeeya 5tii sannaba mar, ugu soo bandhigayaa qorshaha waxqabad iyo ballan-qaadka xisbiga UCID.

Barnaamijkan waxqabad waa mid qaabeysan, qorsheysan oo ku sallaysan xoggo iyo daraasado rasmiya iyo sidoo kale tallada indheer-garadka dalkeena, siiba taageerayaasha xisbiga UCID.

Ujeedada barnaamijkani waa mid jaan go'an oo gundhigeedu yahay ka rarida iyo ka samato bixinta dalkan iyo dadkiisa reer Somaliland duruufahan iyo waayaha qalafsan ee haatan yaala iyo xaqiijinta sidii loo heli lahaa isbeddel horseeda qaran casriya, caqiido sareysa leh, isla markaana aqoontu hoggaamiso oo ka korey qaraabo kiil, musuqmaasuq, jahli iyo horusocod la'aan.

Ugu dambeyntii, Qorshahan Waxqabad waa mid caqli gal ah oo ay u dhan yihiin kaabayaashiisii farsamo (technical components) isla markaana, ka dib cilmi iyo gorfeyn dheer loo qaabeeyey si hormeysan oo hanaansan. Sidaas daraadeed, UCID waa xisbi ay u cadahay talladii iyo qorshihii uu ku hoggaamin lahaa dalkan.





Saxeex__________________
Saxeex__________________
Eng. Faisal Ali Warabe Dr. Moh'ed-Rashid
Sh. Hassan
Musharaxa Madaxweyne Musharaxa
M/weyne Xigeen
Xisbiga UCID Xisbiga UCID

## XOGAHA QORSHAHAN-WAXQABAD LAGU SALLEEYEY

Xisbiga UCID, isagoo ogsoon ahmiyada ay leedahay in qorshe kastaaba ku salleysnaado xoggo, mabaa'dii iyo hawraar (basement factors) gundhig looga dhigo waxaa laga duulaayo, ayaa uu qorshahan iyo meel-marintiisaba ku salleeyey qoddoban hoos ku qoran: -

1. Diinta Islaamka iyo Nidaamka bulsho ee diinteenu jideysey isla markaana adkeysey in tallo kasta oo umad Islaam ah lagu salleeyo;
2. Dhaqanka, Hidaha iyo Milgaha aynu umad ahaan hantida u leenahay kagana duwanahay quruumaha kale ee caalamka ku uuman;
3. Daraasad iyo falanqayn guddo balaadhneyd muddana soo taxneyd oo xisbigu ku sameeyey xaalada dalka iyo indho-ku-

haynta dhaw ee xisbiga UCID ku hayo hadba waayaha dadka iyo dalka JSL;

4. Tallooyinka aqoonyahanka, culimaa'udiinka, indheer-garadka, waayo-araga iyo cid kasta oo horumarka JSL ee gudaha iyo dibeda ku sugan ee siyaasadaha iyo falsafada xisbiga UCID taageera;
5. Daraasadeynta iyo ka faa'iideysiga dalalka horumarka sameeyey ee geediga ka bilaabey marxaldo kuweena la mid ah, isla markaana aynu wax wadaagno.

## KAABAYAASHA QORSHAHA WAXQABAD (Platform control & evaluation tools)

Barnaamijka dhabta ah ee ku qotoma xaqiiqadda iyo waayaha hadba jira, waa ka leh tabo, hab iyo hanaan qeexan oo lagu xakameeyo laguna qiimeeyo hawlaha hirgalineed ee qorsheyaasha barnaamijkaasi wato, (Control and Evaluation tools), haddaba xisbiga UCID waxaa uu dejiyey tallaabooyin dhaqan-gal ah oo uu ku daba-gali doono kuna qiimeyn doono midho-dhalka qorshahiisan waxqabad marka uu tallada dalka qabto.

Iyadoo [1]**nooca dawladeed** ee xisbiga UCID dhisi doonaa tahay mid nidaamsan, tayo leh isla markaana kooban, taas oo ah mid lala xisaabtami karo (accountable) ayaa la dejiyey qoddoban hoos ku qoran oo ah tallaabooyin lagu qiimeyn doono guud ahaan tayada iyo waxqabadka xukuumada xisbiga UCID hoggaaminayo;

1. Tix-galinta warbixin sannadeedka guddida kormeerka guud (public monitoring committee, (eeg qoddobka 1.3.3) taasoo xog sannadle ah kasoo saari doonta tayada iyo waxqabadka hay'adaha xukuumiga ah ee dalka.
2. Tixgalinta warbixinta rasmiga ah ee sannad kasta Xafiiska Hantidhawrka Qaranku soo saaro, warbixintaas oo koobsan doonta hanaanka maamul iyo maaliyadeed ee dhammaan hay'adaha dawliga ah (National Institutions' financial, operational and compliance audits report)
3. Kormeerka madaxda xisbiga ku qiimeyneyso hawlaha dawladda, xisbigu wuxuu ballanqaadayaa in uu kormeer balaadhan isla markaana qorsheysan oon lasii shaacin ku mari doono goobaha dakhli-ururineed, kharash-bxineed, wasaaradaha, xafiisyada gobolada (governors' offices), iwm.
4. Wixii kasoo baxa Doodaha ku saabsan xaaladaha dhaqan-dhaqaale iyo hirgalinta barnaamijka xukuumada ee

[1] Faahfaahinta nooca dawladeed ee xisbiga UCID dhisi doono waxaad ka helaysaa **qoddobka 1.1**

mudaneyaasha golaha wakiilada ayaa uu xisbiga UCID ku tallo iyo go’aan qaadan doonaa.

# 1. MAAMUL-WANAAGA

Hoggaanku waa waxyaalaha ugu muhiimsan ee looga baahan yahay Somaliland. Xisbiga UCID waxaa uu aaminsan yahay in dhibaatada ugu weyn ee maanta Somaliland haysataa  tahay hoggaan xumo. Dhibaatadani waa mid soo taxneyd ilaa maalintii Somaliland

xorriyada qaadatey, 1960kii. UCID waxay ballanqaadaysaa inay amuurtaas wax ka beddesho. Si loo helo maamul-wanaagna, UCID waxay la imanaysaa hoggaamin han iyo himilo leh; hoggaamin ku tamarisa aragti-dheer, daacadnimo iyo Alle ka cabsi.

Xisbiga UCID waxaa uu hirgalin doonaa maamul-wanaag iyo is-xukun casriya, dimoqraadiya isla markaana ka sallaysan qiyamkeena iyo horumarka dalku hiigsanayo, waxaa aannu u aqoonsanaynaa 10-ka sannadood ee soo socda, 2010-2020, 10-sannadood ee horumarka iyo barwaaqeynta Jamhuuriyadda Somaliland.

## 1.1 Dhisida dawlad kooban oo tayo leh

Xisbiga UCID wuxuu ballan-qaadayaa oo ka go'an dhisida dawlad kooban isla markaana tayo leh. Tirada wasiirada xukuumada UCID waxa ay noqon doonaan qiyaas ahaan inta u dhaxaysa 12 – 18. Wasiirada aannu xilka u dhiibaynaa waxay isugu jiri doonaan rag iyo haween.
Waxa aannu ku xullan doonaa madaxda dawlada astaamahan hoos ku qoran: -

1. Aqoon sare oo uu qofku ku hanan karo xil-gudashadiisa iyo hanaanka dawladnimo
2. Aqoon diimeed, Alla ka cabsi iyo Daacadnimo.
3. Wadaniyad iyo aragti-umadeed
4. Nadiif inuu qofku ka yahay musuqmaasuq, caddaalad daro, qabyaalad iyo karti darro iyo in uuna u hanqal taagin hantida umadda.

Xukuumada xisbiga UCID dhisi doonaa waxay noqoneysaa mid isu-dheeli tiran oo fursad siinaysa dhammaan qaybaha bulshadu ka kooban tahay; waxa aannu ballan-qaadaynaa in Dhallinyarada, Haweenka, Bulshada la hayb sooco, Naafada iyo dhammaan degaamada Somaliland ka kooban tahayba saamigooda si siman loo tixgalin doono.

Xukuumada UCID waxay noqon doontaa mid maamul daadegsan leh oo qof kastaa doorkiisii ku haboonaa leeyahay. Xafiiska Madaxweyne Xigeenka xukuumadu wuxuu noqon doonaa mid kaalin iyo door buurran leh, isla markaana ay hoos yimaadaan hay'ado badani iyadoo laga faa'iidaysanayo Dastuurka Qaranka qoddobka 91aad, farqadiisa 2aad.

Si loo helo madax iyo hawl-wadeeno isla jaan qaadaaya oo aqoon ahaan dhisan, xisbiga UCID waxaa uu ballan-qaadayaa inuu tayeyn, daryeel iyo tabobar u geysan doono shaqaalaha dawladda si ay ugu fududaato inay gutaan waajibaadkooda isla markaana ka midho-dhaliyaan yoolka iyo hawlaha horumarineed ee la hiigsanayo.

## 1.2 Dib-u-habeynta Hay'adaha Xukuumada

UCID waxaa ka go'an oo ay ballanqaadeysaa dib-u-habeynta, tayeynta, iyo casriyeynta hab-maamulka iyo addeega hay'adaha xukuumada sida wasaaradaha iyo hay'adaha qaranka (Ministries and National agencies). Si looga midho-dhaliyo arrintaas, waxa aannu ku dhaqaaqi doonaa dhisida qaab-dhismeed xukuumiya kaasoo ah mid isgaadhsiisan, waafaqsan qorshaha horumarineed ee UCID isla markaana uu qaadi karo dhaqaalaha kooban ee dalku.

## 1.3 Abuurista hay'ado cusub iyo xoojinta kuwii hore u jirey

Xisbiga UCID, isagoo ogsoon;

1. Muhiimada ay hay'adaha qaarkood u leeyihiin tayada dawladnimo iyo addeega bulshada,
2. Tayo darnaanta hay'adahaas intooda haatan dhisan haysata,
3. Maqnaanshaha hay'ado badan oo lama huraan ah iyo
4. Jiritaanka hay'ado ama guddiyo aan wax dan ahi ugu jirin umadda, isla markaana dul saar ku ah dalka oo maamulkan haatan jira ee aan habaysneyni sameeyey,

   ayaa uu xisbiga UCID go'aansadey in marka uu tallada qabto aasaaso hay'ado cusub isla markaana xoojiyo kuwii hore u jirey, hay'adaha la sameyn doono iyo kuwa la xoojin doonaba waxaa ka mid ah:-

### 1.3.1 Guddida Culimada (Islamic Council)

Waxa aannu sameyn doonaa Guddida Culimada anagoo ka duulayna Distoorka Qaranka qoddobadiisa 115aad ilaa 121aad, guddidani waxay gudan doontaa waajibaadka dastuurku qeexey, isla markaana waxay iswaafajin doontaa xeerarka dalka iyo Shareecada Islaamka.

### 1.3.2 Hay'adda Marsooyinka (National Ports Authority)

Waxa aannu sameyn doonaa hay'ad xilkeedu yahay horumarinta dekedaha dalka taas oo waajibaadkeeda, yoolkeeda iyo hiigsigeedaba si cad loo qeexi doono.
Hay'adani waxay u guntan doontaa sidii loo horumarin lahaa dhammaan meelaha dalku wax-ka-dhoofiyo, waxna kala soo dego, sida dekadaha iyo madaarada dalka, iyadoo dhinaca kalena la horumarin doono isgaadhsiinta casriga ah si dalku u noqdo marso muhiima oo ganacsi oo Bariga Afrika ka dhex muuqata (East Africa Commercial Gateway)

### 1.3.3 **Guddida Kormeerka Dawladda (Public Monitoring Committee)**

Waxa aannu sameyn doonaa guddi kormeer (Public Monitoring Committee) oo madax banaan. Guddidani waxay noqon doonaan xubno bulshada ka tirsan oo ka kooban aqoonyahaniin xul ah.
Guddidu waxay dusha kala socon doontaa tayada waxqabad iyo kartida wasaaradaha, waxaaney soo saari doontaa warbixin sannadeed (Annual Report) ku saabsan shaqada iyo hab-dhaqanka wasaaradaha, hay'adaha dalka iyo wasiirada dawlada iyagoo isla markaana soo jeedin doona tallooyin iyo tallaabooyin ku haboon. Waxaana waajib ku noqon doonta xukuumada UCID inay ku dhaqanto tallooyinka guddida isla markaana ka qaado tallaabooyinka ku haboon madaxda warbixintu tilmaanto waxtar la'aantooda ama caddaalad daradooda. Xilka guddida oo qeexan waxaa faah faahin doona xeer.

### 1.3.4 **Guddida Dhaqaalaha Qaranka (National Economic Council)**

Waxa aannu dhiseynaa Guddi Dhaqaale oo xul ah isla markaana ku qalabeysan aqoon sare oo dhaqaale iyo xoggo rasmiya oo ay ka duulaan. Guddidani waxay qabanayaan hawlo ay ka mid yihiin kuwan hoos ku qorani:

- ✓ Guddidu waxay eegayaan in dhaqaaleha waddanku ku socdo istaraatijiyadii xisbigu u dejiyey si loo helo koboc dhaqaale
- ✓ Guddidu waxa uu eegayaa isla markaana darsayaa god-daloolooyinka ku yimaada hay'adaha dhaqaalaha iyo dhibaatooyinka soo waajaha dhaqaalaha
- ✓ Guddidu waxaa uu ka shaqeynayaa tayeynta hay'adaha dhaqaalaha dalka, isla markaana waxay guddidu hubineysaa in shaqaalaha ku hawlan dhaqaalaha dalku leeyihiin tabobarkii iyo khibradii loo baahnaa.

Haddaba hawlaha guddida oo faahfaahsan waxaa lagu cadayn doonaa xeer lagu lifaaqo doono aasaaska guddidan.

### 1.3.5 Hay'ada Sirdoonka Qaranka (National Intellegence Agency)

Hay'adu waxay ka shaqeyn doontaa ilaalinta nabad sugidda qaranka. Waxa ay ku shaqo yeelan doontaa ka hortaga dhibaatooyinka cadawga shisheeye, waxa aanay ururin doontaa wirarka sirta ah ee arrimahaas khuseeya, iyadoon arrimaha dalka gudihiisa wax shaqo ah aan ku lahayn. Iyadoo waajibkeeda iyo mas'uuliyadaheedana uu qeexi doono xeer.

Dhinaca kale waxaa aannu xoojineynaa, isla markaana dib-u-eegis iyo dib-u-habeyn balaadhan ku sameynaynaa hay'adahan hoos ku qoran: -

1. Bangiga Dhexe, (Central Banking System)
2. Xafiisyada Hanti-dhawrka iyo Xisaabiyaha Guud (Auditor and Accountant Gens.)
3. Guddida Caddaalada Qaranka (National Judicial Commission)
4. Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee qaranka (National Attorney-General)
5. Hay'ada Waddooyinka JSL (Somaliland Road Authority)
6. Xafiisyada Badhasaabada Gobolada (Regional Administrations)
7. Hay'ada Shaqalaha (National Labor commission)
8. Sidoo kale waxaa dib loo habayn doonaa hay'ada CID-da iyadoo lagu baddeli doono hay'ad la yidhaahdo [2]**Somaliland Investigation Agency**.

## *Ururada Bulshada Rayidka ah (Non-state actors)*

Xisbiga UCID waxa uu muhiimad siinayaa doorka ururada aan dawliga ahayn (Non-state actors) ku leeyihiin dib u dhiska waddanka dhinac walba, dhaqaalaha, xuquuqul insaanka, cilmi baadhista, kobcinta aqoonta iyo xoojinta doorka haweenka iyo dhallinyarada.

Xisbiga UCID waxa uu u arkaa ururada bulshada rayidka ah mid ka mid ah tiirarka dawladnimo ee dalku ku dhisan yahay. Sidaas daraadeed, Xisbiga UCID waxa uu tixgalin mudan siin doonaa

[2] Hay'ada dambibaadhista qaranka oo faahfaahsan ka akhri **qoddobka 4.1.1** ee ku saabsan tayaynta xafiiska xeer-ilaaliyaha qaranka iyo ilaalinta madaxbanaanidiisa.

xoojinta iyo taageerada ururadaasi iyo qorshayaasha ay la yimaadaan.

## 1.4 Dib-u-habeynta Qawaaniinta Dalka

Xisbiga UCID isagoo ogsoon muhiimada ay leedahay iswaafajinta, kaabida iyo tayeynta xeerarka dalku, ayaa uu ballan-qaadayaa inuu ku dhaqaaqo sidii loo tayeyn lahaa, dibna loogu habayn lahaa xeerarka Dastuurka JSL ka farcama.

Waxaa aannu sidoo kale ku dhaqaaqi doonaa sidii loo dejin lahaa xeerka maamulka iyo maareynta wasaaradaha kaas oo qeexaya shaqada iyo waajibaadka dhammaan madaxda iyo hawl-wadeenada wasaaradaha, si loo helo xisaabtan, maamul-daadegsan iyo tayo (Accountability, Decentralization and Quality). Sidaas daraadeed, waxaa caddaan doonta doorka iyo shaqada hay’ad kasta iyo sidoo kale xidhiidhka ka dhexeeya hay’adaha xukuumada.

Dhinaca kale, xeerarka dalku waxay noqon doonaan kuwo aan iska hor imanayn, la jaanqaadaaya xaaladaha dhabta ah ee jira isla markaana waafaqsan Dastuurka Qaranka (consistent with the National Constitution). Dib-u-nidaaminta xeerarku waxay keeni doontaa in mas’uul kasta la qeexo waajibaadkiisa iyo awoodihiisa taas oo muwaadiniinta awood u siinaysa inay kula xisaabtamaan mas’uuliyiinta dawladda sida ay ugu addeegeen.

Dib-u-habeynta, Wax-ka-beddelka iyo Kaabista xeerarka waxaa ka shaqeyn doona, isla markaana haggi doona xarun qawaaniin oo la samayn doono, (Eeg qoddobka 4aad: Suggida Caddaalada Dalka).

## 2. ADKEYNTA NABADDA IYO AMNIGA

Xisbiga UCID waxaa uu aaminsan yahay in Nabada iyo Amnigu yihiin saldhiga horumarka, jiritaanka qaranimada jamhuuriyadda Somaliland iyo nolosha muwaadiniinta dalka, sidaas daraadeed, xisbiga UCID waxaa ka go’an oo uu ballanqaadayaa adkeynta nabadgelyada iyo amniga si looga midho-dhaliyo yoolka qaran ee aynu hiigsanayno isla markaana Somaliland u noqoto dal xasilloonida, dawladnimada iyo horusocodka lagu majeerto.

UCID waxaa uu ku xaqiijin doonaa barnaamijkiisa nabadgelyada iyo amniga qaranka tallaabooyinkan soo socda:-

- Sugida nabada iyo amniga gudaha iyo difaaca iyo sugida xuduudaha, sida dhulka, bada iyo cirka.
- Ka hortagida wixii khilaafaad iyo qulqulatooyin keeni kara
- Xakamaynta hubka fudud iyo diiwaan-gelintiisa
- Tayeynta iyo kor-u-qaadista aqoonta, qalabka iyo wacyiga hay’adaha amniga ku shaqada leh,

Sidoo kale, waxa aannu u aragnaa macnaha nabadda mid ka baxsan xaalada dagaal iyo dirir la’aanta balse ka dhumuc weyn intaas, sidaas

daraadeed, xisbiga UCID waxaa uu ka shaqeyn doonaa sidii uu u adkeyn lahaa kaabayaasha nabad-gelyada iyo aminga saldhiga u ah, ee ay ka mid ka yihiin sugidda caddaalada, kobcinta dhaqaalaha qaranka iyo dakhliga dadweynaha, la dagaalanka saboolnimada, musuqmaasuqa iyo wax-is-daba marinta maamul, eexda/qaraabo kiilka iyo kor u qaadista aqoonta iyo wacyiga dadweynaha, waxa kale oo aannu samaynaynaa barnaamij qeexan oo ku wajahan ilaalinta nabadgelyada qaranka iyo amniga muwaadiniinta iyadoo laga hortagi doono wax kasta oo dhibaato ku ah nolosha, xorriyada iyo xuquuqda muwaadiniinta.

## 3. SUGGIDA CADDAALADA DALKA

Waxaan la isla diidaneyn, inay maanta caddaalada Somaliland, ee ay gacmaha ku hayaan maxkamaduhu, ay dhutiyeyso oo ay leedahay god-daloolooyin badan oo shacbigu ay ku dhiban yihiin.

Xisbiga UCID waxaa uu ku samayn doonaa maxkamadaha iyo hay'adaha kale ee caddaalada isbeddel dul iyo hoos ah (fundemental change).
Xisbiga UCID waxa uu ballanqaadayaa in uu dib-u-habeyn, kaabis iyo wax-ka-beddel ku sameeyo qaanuunka caddaaladeed ee dalka, si meesha looga saaro sharciyada gaboobey een wakhtigan shaqeyn kareyn lagana dhaxley nidaamkii dulmiga ku dhisnaa ee Siyad Barre, sida xeerka ciqaabta (Penal Code), iyo si loo soo saaro sharciyo la jaanqaadi kara isbeddelka dalka, Shareecada Islaamka iyo horumarka la hiigsanaayo.

Xisbiga UCID waxaa uu gabi ahaanba meesha ka saarayaa Wasaarada Caddaalada ee haatan iskeed u taagan, taas oo uu ka dhigi doono waax (Department of Justice) hoos timaada Wasaarada diinta, sidaas

daraadeed waxa aannu abbuureynaa wasaarad la yidhaahdo Wasaarada Diinta, Awqaafta iyo Cadaaladda.

Xisbia UCID waxaa sidoo kale ka go'an oo uu ku dhaqaaqi doonaa sidii loo kala saari lahaa Maxkadama Sare iyo Mida Dastuuriga ah (Separation of Supreme and Constitutional courts), si taasi u suurto-gashana, waxaa si waafaqsan Dastuurka Qaranka, la samayn doonaa Guddi 7-xubnood ka kooban oo maxkamada Dastuuriga ah maamula iyo Guddi kale oo 7-xubnood ka kooban oo Maxkamada Sare maamula, iyadoo guddi kastaa yeelan doonto qaab-dhismeedkeeda, hawlaheedana si weyn loo qeexi doono, labada guddiba waxaa guddoomin doona Guddoomiyaha Waaxda Garsoorka Somaliland (guddoomiyaha maxkamada sare iyo ta distooriga ah oo ah hal qof ayaa ah guddoomiyaha waaxda garsoorka) Waxa kale oo la curin doonaa xeerkii fasiraada dastuurka, si looga fursado murano dastuuriya oo soo noq noqda, ku tumasho sharci oo timaada iyo isfaham daro siyaasadeed oo timaada.

## 3.1 **Maxkamado Caddaalad Ku Dhisan**

Sida magaciisa ka muuqata, xisbiga UCID waxaa uu ballanqaadayaa inuu caddaalad loo siman yahay oo ku sallaysan Shareecada Islaamka isla markaana waafaqsan dastuurka dalka waddanka ka hirgalin doono.

Xisbiga UCID waxa uu ballanqadayaa in uu wadanka ka hirgeliyo cadaalad loo siman yahay sida magaciisa ka muuqata lana hirgeliyo qodobada cadaaladda ee dustuurka ku cad iyo xeerarka waddanka.

Waxaanu dib u eegi doonaa maamulka maxkamadaha dul ilaa hoos si loo xaqiijiyo cadaalad taam ah muwaadin kastaana u helo xaquuqdiisa.

Xisbiga UCID waxaa ka go'an in uu maamulka maxkamadahu noqdo mid madaxbanaan, isla markaana si madaxbanaan si madaxbanaan loogu asteeyo nidaam miisaaniyadeed gaar ah waaxda garsoorka dalka (the judiciary organ of the state). Dhinaca kale, waxa aannu ka shaqeyneynaa sidii hoggaanka garsoorka dalku u gudan lahaa waajibaadkiisa, kormeer iyo qiimeyn buuxdana ugu samayn lahaa hawl-wadeenada caddaalada dalka si loo helo dalacsiintii, erigii iyo hoos-u-dhigidii hawl-wadeenada garsoorka (appraisal, discharge and demotion) taas oo dhiiri-galineysa shaqo-wanaaga iyo tayada addeega waaxda garsoorka.

Waxa aannu dib-u-eegeynaa qaab-dhismeedka guddida caddaalada, iyadoo meesha laga saari doono wax saameyn ah oo ay fulintu ku yeelato guddidaas, tusaale ahaan, waxaa la baabi'in doonaa xubinimada guddoomiyaha hay'ada shaqaaleha iyo madaxda wasaarada caddaalada ee guddidaas; iyadoo agaasimaha guud ee Wasaarada Diinta, Caddaalada iyo Awqaaftu oo kaliya uu xubin

guddidaas ka noqon doono, isla markaasna aanu ka qaban karayn xil xubinimo dhaafsan.

Waxa aannu kor u qaadi doonaa tayada garsooreyaasha iyo looyarada maxkamadaha, iyadoo waajib laga dhigi doono in garsoore kastaa noqdo mid aqoon sare u leh shareecada Islaamka, qaanuunka iyo dhaqanka dadka JSL, isla markaana yahay qof si dhammeystiran uga soo baxay jaamacad. Waxa aannu sidoo kale si weyn oo deg-deg ah u tabobari doonaa shaqaalaha haatan ka hawl-gala waaxda caddaalada een aqoonta lahayn, balse ka nadiif ah eex iyo wax-is-daba marin, sidoo kale, waxa aannu waajib ka dhigaynaa in dhammaan kalkaaliyeyaasha maxkamaduhu yeeshaan aqoon diineed iyo mid qaanuun oo u suurto-galisa inay ku sifoobaan addeegeyaal iimaan leh isla markaana tayo waxqabad iyo caddaalad leh.

Tallaabadaas kor ku xusani waxay meesha ka saari doontaa aqoon la’aanta haatan ka jirta maxkamadaha dalka, iyaddoo tusaale ahaan, maanta ay 99-garsoore ka hawl-galaan maxkamadaha waddanka, ayaa ay 13-kaliyaati ka leeyihiin aqoon qaanuun, halka 86-ka kale yihiin dad aan aqoon diineed iyo mid sharci toona oo ay wax ku kala saaraan aan lahayn.

Waxa aannu dib-u-eegis iyo daraasad balaadhan lagu samayn doonaa tayada iyo tirada maxkamadaha dalka, iyadoo la samayn doono maxkamad u gaar ah dacwadaha madaniga ah (civil) iyo maxkamad u gooni ah dacwadaha dambiyada (criminal), si loo suggo xaqa muwaadinka iyo ciqaabta jabinta sharci ama xad-gudubka ku wajahan labadaba. Sidoo kale, waxaa aannu samayn doonaa maxkamada maareysa dacwadaha ku saabsan arrimaha  maamulka (administrative court) ee ay dawladdu dhinaca ka tahay.

Si loo suggo wacyiga dadweynaha ee ku wajahan xuquuqda ay leeyhiin iyo waajibaadka qaran ee saran, isla markaana loogu fududeeyo helida addeegyada caddaaladeed ee ay u baahan yihiin, waxaa la aasaasi doonaa xarun shaqadeedu tahay wacyigalinta sharciga iyo xidhiidhinta dadweynaha iyo hay’adaha caddaalada. Xaruntani waxay gudan doontaa mas’uuliyado ay ka mid yihiin:

- Wacyi-galinta iyo shuruuc faafinta,
- Xallinta dhibaatooyinka idaariga ah ee dadku tirsanayaan
- Tallo-bixinta sharciyada u baahan wax-ka-baddelka

Waxa aannu xaruntan ka shaqaaleysiin doonaa dad aqoon sare iyo hawl-karnimo leh. Xaruntani waxay ka shaqeyn doontaa sidoo kale, dib-u-habeynta xeerarka dalka-taas oo uu rabo xisbiga UCID in lagu suurto-galiyo qawaaniin waafaqsan dastuurka, la jaan-qaadaya horumarka dalku hiigsano, isla markaana is-waafaqsan oon iska hor imanayn.

### 3.1.1 **Tayeynta Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud**

Waxa aannu tayeyn xoog leh ku samayn doonaa xafiiska xeer-ilaalinta guud ee qaranka, iyadoo aannu curin doono Siyaasad iyo Hanaan cad (policy and procedures) oo xeer-ilaalintu ay kula shaqeyso waaxaha dawladda ee caddaalada iyo fulinta (Judiciary and Executive organs), iyo sidoo kale doorka iyo wada-shaqeynta uu xafiiskani la leeyahay waaxaha nabadgalyada (police and investigation departments). Si taasi u suurto-gasho waxaa sidoo kale aannu curinaynaa Siyaasad qaran oo baadhitaan (National Investigation policy), taas oo lagu aasaasi doono hay'ad baadhitaan oo la yidhaahdo, hay'ada baadhitaanka qaranka (National Investigation Agency) taas oo si toos ah u hoos iman doonta xeer-ilaaliyaha guud ee qaranka, hay'adani waxay noqon doontaa mid beddesha hay'ada CID-da la yidhaahdo ee haatan hawl-gasha, waxaanay noqoneysaa hay'ada ugu sareysa ee baadhista dembiyada dalka gudihiisa ka dhaca, iyadoo si madaxbanaan hawlaheeda u gudan doonta, cidna aanay awoodi doonin inay joojiso baadhitaan ay bilawday.

Si nabadgelyada gudaha loo xoojiyo, loogana hortago falal kasta oo dhibaateynaya nabadgelyada nafaha iyo hantida muwaadiniinta, loona qabto isla markaana loo horkeeno caddaalada dambiileyaasha sida ugu dhakhsaha badan, waxaa kormeer iyo qiimeyn joogto ah lagu samayn doonaa addeega, tayada iyo caddaalada qaybaha dambi-baadhista iyo ilaalinta nabadgelyada.

## 3.2 Suggida **Xuquuqda Dadka (Xuquuqul Insaan)**

Xisbiga UCID waxaa ka go'an oo uu ballanqadayaa ilaalinta xuuqda iyo xorriyada muwaadiniinta Jamhuuriyada Somaliland, iyada oo uu si dhab ah u hirgalin doono dhammaan qoddobada dastuuriga ah ee damaanad qaaday xuquuqda iyo xorriyada (Rights and Freedom).

Waxa aannu ku dhaqaaqeynaa dhismaha qaab-maamul iyo hoggaan qaran oo u taagan difaaca, ilaalinta iyo ixtiraamka xuquuqda iyo xorriyada ay damaanad qaadeen Diinteena Islaamka iyo Dastuurkeenu. Arrintaas waxa aannu ku suurto-galineynaa iyadoo qiimeyn joogto ah lagu sameeyo hay'adaha dawladda iyo xarumaha xabsiyada iyadoo sidoo kale aanu wada-shaqeyn dhaw la yeelan doono dhammaan hay'adaha madaxa banaan ee ku hawlan xuquuqda iinsaanka.

Xisbiga UCID waxaa uu dib-u-eegayaa komishanka xuquuqul insaanka hadda jira iyo xeerkii lagu aasaasayba.

# 4. [3]TAYEYNTA CIIDAMADA DALKA

Xisbiga UCID waxaa uu u taagan yahay dhisida ciidamo cuddoon oo leh waxyaabihii looga baahnaa, sidaas daraadeed waxa aannu ciidamada dalka ku xoojin doonaa aqoon ay u yeeshaan diinta Islaamka, wadaniyada, asluubta xil-gudasho iyo xirfado kala duwan oo ay kaga qayb qaataan horumarinta qaranka JSL. Waxa aanu ku dhaqaaqi doonaa sidii ay ciidamadu u wada yeelan lahaayeen astaamo aqooneed, asluubeed, wadiniyeed iyo hawl-karnimo. Taas oo keeni doonta in ciidamada dalku noqdaan qaar u taagan adkeynta midnimada dalka iyo dadka, difaaca diinta iyo ilaalinta karaamada muwaadiniinta, xoriyatul qawlka iyo ka fogaanshaha wixii karaamada dalka hoos u dhigaya.

## 4.1 **Ciidanka Qaranka**

Waxaanu mudnaanta siinaynaa sidii dalku uu u yeelan lahaa Ciidan qaran oo tayo leh casrina ah (Modern national forces), lehna tababarkii loo baahnaa, oo ku qalabaysan hubka casriga ah iyo aqoon milatari, isla markaana gudan kara waajibaadkiisa difaac. Waxa uu xisbiga UCID balanqaadayaa inuu dhammeystiro sameynta qaybaha ciidan ee qaran yeelan karo, sida ciidankii difaaca cirka, ciidanka cirka, ciidanka badda, ciidanka difaaca xeebaha iyo qaybaha kale ee ciidan yeelan karo.

Ciidanka qaranka ee xisbiga UCID dhismihiisa samaynayaa waxaa saldhig u ahaanaya tabobaro dhammeystiran, qalabayn casri ah iyo tayo uu ku gudan karo waajibaadka uu u xilsaaran yahay ciidan qaran.

Waxa aannu balan qaadaynaa inaannu darajadii ciidamada soo celino, si loo helo kala dambayntii, jaran-jaradii iyo haybadii ciidamadu lahaayeen.
Waxaannu sidoo kale balanqaadaynaa in aanu kordhino mushaharka iyo inay helaan daryeelkii ciidan u baahnaa.

Xisbiga UCID waxaa uu tayaynayaa dugsiyada tababarka ee hadda jira, isagoo abbuurayana kulliyado ciidan oo hor leh, isla markaana u diri doonaa tabobar dibadeed saraakiisha, layli saraakiisha iyo saraakiil xigeenada.

## 4.2 **Ciidanka Booliiska**

[3] Waxa xusid mudan in xisbiga UCID dejiyey siyaasad dhammeystiran isla markaana faahfaahsan oo ku aadan tayeynta ciidamada dalka, balse waxaa dhukumentigan lagu qoran in kooban oo siyaasadaas ka mid ah, sababo la xidhiidha ilaalinta sirta qaran ee dalka Somaliland, maadaama arrimaha ciidamadu xasaasi yihiin.

Si loo suggo nabadgelyada dadka reer Soomaliland, si qof kastaaba naftiisa iyo maalkiisuba u nabadgalo, waxaa xisbigu tayaynayaa hawlaha ciidanka booliiska iyaddoo tababar sare iyo aqoon la siinaayo, xisbiga UCID waxaa uu ku qalabayn doonaa ciidanka booliiska isgaadhsiin iyo qalab casri ah oo u fududeeya hawlihiisa.

Waxaa la casriyeyn doonaa dugsiyada tababarka bilayska ee hadda jira, waxaana la dhisi doona dugsiyo sare iyo kulliyado u gaar ah hawlaha booliiska.

Waxaa uu xisbiga UCID dhammeystiri doonaa dhismaha qaybaha ka dhiman ciidanka booliiska, taas oo wax weyn ka gaysan karta suggida amniga dadweynaha iyo nabadgelyadda maritaanka waddooyinka.

Xisbiga UCID waxa uu abuuri doonaa adeegyo lagu daryeelaayo ciidanka booliiska sida daryeel caafimaad iyo mushaharooyin wanaagsan oo uu kala siman yahay ciidamada kale.

Xisbiga UCID waxaa uu doonayaa in booliska waddanku noqdo mid saaxiib la ah dadweynaha.
Xisbiga UCID waxaa uu tayaynayaa dugsiyada tababarka bilayska ee hadda jira, isagoo abbuurayana kulliyado bilays, isla markaana u diri doonaa tabobar dibadeed saraakiisha, layli saraakiisha iyo saraakiil xigeenada.

## 4.3 Ciidanka Asluubta

Ciidanka asluubtu isagoo kala mid ah ciidamada kale dhinacyada dhismaha, tayeynta iyo kor-u-qaadista daryeelkoodaba, xisbiga UCID wuxuu qadarinayaa hawlaha u gaarka ah ciidanka asluubta sida in ciidanka asluubtu noqdo mid aqoon u leh xuquuqda aasaasiga ah ee maxaabiista siiyana ixtiraamka iyo daryeelka ay mudan yihiin; sidaas daraadeed xisbiga UCID wuxuu dejin doonaa nidaam maxaabiista tababar iyo dhaqan-celin buuxda lagu siiyo si ay bulshada iyagoo akhlaaq iyo dhaqan-wanaag leh dib ula jaan-qaadaan.

Xisbiga UCID waxaa uu tayaynayaa dugsiyada tababarka ciidamada asluubta ee hadda jira, isla markaana u diri doonaa tabobar dibadeed saraakiisha, layli saraakiisha iyo saraakiil xigeenada.

## 4.4 Ciidanka Sirdoonka iyo Socdaalka

Dhinaca kale, xisbigu waxa uu tababar iyo tayayn ku kabi doonaa laanta socdaalka iyo ciidamada sirdoonka si ay u gutaan waajibaadkooda qaran oo aanay ku sifoobin ciidan lagu cabudhinaayo xoriyadaha aasaasiga ah ee shacabka, isla markaana ku qalabaysnaan doona agab casri ah oo ay ku dammaanad qaadi karaan amniga dalka

iyo ka hortagga dhibaatooyinka cadawga gudaha iyo dibedda jamhuurriyada Somaliland.

Xisbigu waxaa uu abuuri doonaa hay'adda sirdoonka qaranka oo la yidhaahdo [4]**National Intellegence Agency,** hay'adaas oo u xilsaarnaan doonta ilaalinta nabadgelyada qaranka iyo ka hortaga wixii dhibaato ah ee dibada kaga imanaya.

# 5. KOBCINTA DHAQAALAHA DALKA

Dhaqaaluhu wuxuu laf dhabar u yahay nolosha iyo jiritaanka umad kasta. Dhaqaaluhu waa qadiyad hor leh oo ka mid ah waajibaadyada maamulada xilkaska ahi kobcintiisa iyo ilaalintiisaba iska xilsaaraan.

Xisbiga UCID waxaa uu rumeysan yahay in aaney jirin hirgalin lagu sameeyey qorshaha iyo siyaasada dhaqaale ee dalka, waxaa kale oo xaqiiq ah in dakhliga dawladda iyo hantida umaddu guud ahaan, ay inta badan faro dhexdood ka baxaan, isla markaana ay saameeyeen musuqmaasuq iyo lunsi badheedh ahi.

Sida Dastuurka Qaranka ***qoddobkiisa 11aad*** dhigayo, xisbiga UCID waxaa uu hirgalin doonaa dhaqaale ku sallaysan suuqa xorta ah, isagoo isla markaasna aan u ogolaaneyn in dhaqaalaha dalku noqdo hanaanka faro-ka-qaadka ah ama noqdo mid xakamaysan (monopoly), sidaas daraadeed, waxa aannu ku dadaaleynaa in dhaqaalaha dalku noqdo mid isku dhafan

Xisbiga UCID waxaa uu si cilmiyeysan u maaraynayaa dhaqaalaha waddanka isagoo kaashanaya cilmi-baadhisyo ku qotoma xaqiiqooyinka jira. Xisbiga UCID waxaa uu sidoo kale dhisayaa kaabayaasha dhaqaalaha saldhiga u ah (economic infrastructure) sida waddooyinka, dekedaha, madaarada, biriijyada iyo isgaadhsiinta casriga ah ee fududeyneysa dhaq-dhaqaaqa dhaqaale.

UCID waxaa ka go'an in tayeyn balaadhan lagu sameeyo xarumaha dhaqaalaha dalka ee hadda jira, laguna kaabo kuwo cusub oo hor leh (Government Financial Institutions)
Tallaabooyinka kale ee xisbiga UCID ka qaadi doono arrimaha dhaqaalaha waxaa ka mid ah;

- Dejinta siyaasad dhammeystiran iyo qorshe sax ah oo dhaqaale; qorshaha dhaqaale ee qaran (national economic planning and policy) ee xisbiga UCID JSL u hayaa waa mid hiigsigiisa iyo ujeedooyinkiisu ay yihiin sidan:

[4] Hay'adani waxa ay yeelan doontaa waajibaad iyo shaqooyin qeexan oo lagu sheegi doono xeer lagu lifaaqayo warqadda aasaaskeeda, ka eeg faahfaahinteeda **qoddobka 1.3.5** ee qorshahan waxqabad.

- ✓ Iyadoo laga faa'iideysanaayo bogcada Illaahay (SWT) ka abbuuray dalka Somaliland, ayaa xisbiga UCID hiigsanayaa sidii Somaliland u noqon lahayd isku-xidhka qaaradaha Eeshiya, Afrika, Yurub iyo woqooyiga Maraykan iyo in Somaliland xaqiijiso inay noqoto quwada dhaqaalaha bariga Afrika (Economic power house of East Africa),
- ✓ In la kordhiyo dakhliga dadweynaha (per capita income)
- ✓ In ilaayo xad la yareeyo lalana dagaalamo shaqo la'aanta iyo ka faa'iideysi la'aanta awooda umadda (unemployment and idleness)
- ✓ In la xasiliyo qiimaha nolosha (price level stabilization.
- ✓ In ilaayo xad la yareeyo lalana dagaalamo faqriga iyo sinaan la'aanta dakhli (reduction of poverty and income inequalities), iyo in la hiigsado in muwaadiniinta laga daboolo ugu yaraan 3-baahiyood ee aasaasiga ah sida **H**oyga, **H**unguriga iyo **H**uga.
- ✓ In la helo dhaqaale aan lug kaliya ku taagneyn ee isku filan tiirar xoogan oo kala gadisana ku qotoma (diversified and self-reliant economy).

Ujeedooyinkaas waxaa muhiimada loo kala siin doonaa siday u kala lama-huraansan yihiin.
Xisbiga UCID waxa uu ku dhaqaaqi doonaa nidaaminta ganacsiga dalka iyada oo loo mari doono dejinta iyo dhaqangalinta qawaaniin saamaxaya ganacsi xor ah oo nidaamsan isla markaana badhi taageeraya qorshaha dhaqaale ee dalka. Taas oo sidoo kale keenaysa ilaalinta danaha ganacsatada iyo bulshada (Merchants and consumers).

## 5.1 **Kor-u-qaadista wax-soo-saarka aasaasiga ah (Primary production)**

Xisbiga UCID waxaa uu si weyn u ballanqaadayaa in uu dejin doono qorshe kor loogu qaadayo wax-soo-saarka aasaasiga ah ee dalka, sida Kalluunka, Milixda, Macdanaha iyo kheyraadka dhulka ku duugan, Beeraha iyo Xoolaha, iyadoo suurto-galinta arrintaasna loo marayo raadinta maal-gashi gudeed (local investment) iyo maal-gashi dibadeed (foriegn investment) iyo raadinta suuqyo hor leh oo si joogto ah loogu iib-geeyo wax-soo-saarkaas.

Xisbiga UCID waxaa uu ganacsatada dalka si xoogan ugu dhiiri-galin doonaa inay u midoobaan maal-gashiga dhabta ah ee dalkooda iyo inay ku fooganaadaan wax-dhoofinta halkii ay wax soo dejinta ku

fooganaan lahaayeen, si bulshadani u noqoto bulsho inta badan wax dhoofisa, wax-soo-saarkeedana iibgeysa (export-oriented society).

### 5.1.1 Kalluunka, Kheyraadka Badda iyo Beriga

Waxa aannu, dib-u-dhis ku samaynaynaa dekedaha dalka isla markaana horumarin ku samaynaynaa xeebaha si loo helo wax-soo-saar kalluun oo hor leh iyo wax-dhoofin balaadhan, dekedaha aannu wax ka qaban doono waxaa ka mid ah; Lawyo-cado, Saylac, Lughaya, Buluxaar, Berbera, Ceel-deraad, , Karin, Conqor, Shalcaw, Xiis, Maydh, Xarshaw, Waqadariya, Laasqorey iyo Ceelaayo; xisbigu waxaa uu maal-galin u raadinayaa kuna sameynayaa dekedaha dalka, iyadoo dekeda Berbera laga dhigo doono mid ay faa'iideystaan wadamada Bariga Afrika ee aan badda lahayn, iyadoo iskaashi arrimahaas lagala samayn doono dalalka Eeshiya oo aqoon dheer u leh isticmaalka dekedaha.

Waxaa la casriyeyn doonaa magaalooyinka xeebta tiiyoo loo samayn doono waddooyin wanaagsan iyo isgaadhsiin casri ah, sidoo kalena loo samayn doonaa koronto ku filan; waxaa cashuurta laga dhaafi doonaa qaboojiyeyaasha lagu isticmaalomagaalooyinka xeebta iyo talaajadahaba. Waxa kale oo la khafiifin doonaa cashuurta shaqaalaha iyo dukaamada ka furan magaalooyinka xeebta ah. Xisbiga UCID waxaa uu dhiiri-galin doonaa cunista iyo dhoofinta kalluunka iyo taageerada kalluumeysatada.

Waxa aannu tayayn ku samayn doonaa ciidamada ilaalada xeebaha iyadoo lala kaashan doono bulshada caalamka, si loo ilaaliyo kheyraadka badda, iyadoo daraasad lagu samayn doono kheyraadka badda Somaliland; waxaa la dhiiri-galin doonaa dhoofinta dhammaan kheyraadka aan laga faa'iideysan ee dalkani leeyahay, taas oo lagu xaqiijinayo in isha ugu muhiimsan ee dhaqaalaha dalku noqoto wax-soo-saarka xeebaha iyo kheyraadka badda.

Xisbiga UCID waxaa uu ku dadaali doonaa sidii loola soo bixi lahaa ama looga faa'iideysan lahaa isla markaana loo dhoofin lahaa kheyraadka beriga, sida Beenyada, Falleenka, Shidaalka, iwm.
Waxaa la dhiiri-galin doonaa dhoofinta dhammaan kheyraadka aan laga faa'iideysan ee dalkani leeyahay.

### 5.1.2 Biyaha iyo Macdanaha Dalka

Xisbiga UCID waxaa ka go'an sidii magaalooyinka waaweyn iyo kuwa yar yarba loo gaadhsiin lahaa biyo nadiif ah, si loo yareeyo cudurada shubanka iyo dhimashada caruurta reer Somaliland.

Xisbiga UCID waxaa uu aaminsan yahay in biyaha dalalka geeska Afrika, sannadadii u dambeeyey ay hoos u dhacayeen, isla markaana ay lama huraan tahay in dalka Somaliland yeesho qorshe jaan go'an oo biyaha dhul ku jira lagula soo baxayo, kuwa roobka ka yimaadana loo kaydin lahaa si looga badbaado abbaaro iyo in nolosha muwaadiniintu khatar gasho, (eeg siyaasada biyaha ee xisbiga UCID).

Dhinaca kale, xisbiga UCID waxaa uu ku dhaqaaqi doonaa sidii waddankani maal-galin ugu raadin lahaa isla markaana loo soo saari lahaa macdanaha kala gadisan ee dhulka ku jira. Waxa aannu daraasad ku samayn doonaa macdanaha kala duwan ee dhulkeena ku jira, sidoo kalena waxa aannu raadin doonaa suuqyo loo iibgeeyo oo hor leh iyo maalgashi lagula soo baxo kheyraadkaas. UCID waxaa ka go'an in kheyraadka dalku guud ahaan iyo gaar ahaan macdanahu maamulkoodu noqdo mid caddaalad ku dhisan isla markaana dadka iyo dalkaba wax loogu qabto laguna horumariyo noloshooda iyo dhismaha dalka.

### 5.1.3 Xoolaha iyo Beeraha

Maadaama uu dhaqaaluhu ku fadhiyey muddo badan xoolaha nool, dadkeenuna u badan yahay reer guuraa, waxa aannu si weyn ugu hawl gali doonaa kobcinta, daryeelka iyo dhaqaaleynta xoolaha iyo reer guuraaga, si looga hortago in dadka xoolo dhaqatada iyo kalluumeysatada ahi kusoo qulqulaan magaalooyinka waaweyn.

Xisbigu UCID waxaa uu qaadayaa siyaasad wax-ku-ool ah oo lagu raadinayo suuqyo hor leh oo loo diro xoolaheena, isla markaana lagu xoojinayo suuqyadii hore u jirey ee Carabta, sidoo kale waxaa uu ku dedaalayaa sidii loo casriyeyn lahaa hababkii hore ee xoolaha loo dhaqan jirey, loo raaci jirey loona dhoofin jirey; waxaa si tartiib ah loo yareyn doonaa xoolihii noolaa ee la dhoofin jirey, iyadoo lagu baddelayo dhoofinta hilibka, hargaha, saamaha, lafaha iyo caanaha xoolaheena. Waxaa la sugi doonaa addeeg hufan oo lagu qaabilo xool dhaqatada iyo beeralayda. Dhinaca kalena waxaa kor loo qaadayaa nadaafada iyo caafimaadka goobaha xoolaha lagu dhaqo iyo kuwa kalluunka lagu kaydiyo.

Waxa aannu samayn doonaa kulliyado aan ku koobnayn hal gobol ee gobolada xooluhu ku badan yihiin ku yaala. Waxaa la dhiirigalinayaa barashada dhaqniinka iyo dakhtarada xoolaha.

Xisbiga UCID waxaa uu samaynayaa meel lagu baadho Geela iyo sidii loo horumarin lahaa cunitaanka hilibka geela ee dadka adduunka; waxa aannu qaadi doonaa olole xoog leh oo lagu suuq geeyo hilibka geella iyadoo bulshada caalamka laga raaridayo manfaca iyo caafimaadka ku jira cunitaanka hilibka geella iyo cabitaanka caanihiisa.

Xisbiga waxaa ka go'an in uu dejiyo siyaasad lagu soo celinayo dhul daaqsimeedkii xoolaheena, isagoo dib u beeri doona noocyadii daaqsinkii nafaqada lahaa ee haatan sii dabar go'aya iyadoo isla markaana dib qorsheyn lagu samayn doono dibna loo soo celin doono seera daaqsimeedyadii guud ee dadka ka dhexeeyey, lana baabi'in doono seerayaasha dadku sida sharci darrada ah u ooteen.

Xisbigu waxaa uu hiigsanayaa sidii dhaqashada xooluhu u noqon lahayd waxyaalaha ugu faa'iidada iyo sharafta badan isla markaana looga gudbi lahaa aragtida ah in badawnimada iyo dhaqashada xooluhu xidhiidh ka dhexeeyo.

Waxaanu abbuuri doonaa bangiga xoolo dhaqatada, beeralayda iyo kalluumeysatada horumariya (development and microcredit bank) Kaas oo amaahin doona lacag reer guraaga xoolo dhaqatada ah, kalluumeysatada iyo beeralayda. Dayntu wax dulsaar ah ma yeelanayso, laakiin waxa lagu xidhi doonaa shuruudo gaar ah. Sidoo kale, bangigani waxaa uu raadin doonaa suuqyo dibadeed iyo maalgashi hor leh oo lagu sameeyo dhinacyada kor ku xusan, isagoo la garab taagnaan doona taageero farsamo, maaliyadeed iyo dhiiri-galineedba.

Xisbiga UCID waxa uu dejiyay qorshe ku aadan wax soo saarka beeraha oo marka hore ku fadhida cilmi baadhis xaqiiqo ah iyo tallooyinka khubarada culuumta beeraha oo la soo ururiyay, sidaas daradeed, Xisbiga UCID waxa ka go'an in uu si wayn kor ugu qaado wax soo saarka beeraha isaga oo dhiiri galinaya maalgashiga beeraha isla markaana qaadi doona olole lagu dhiirigalinayo muwaadiniinta in ay dhulkooda wax kala soo baxaan. Hawlgalkaas waxa loo bixin doonaa Ololihii Cagaarnaa (Green Revolution).

Si kor loogu qaado wax soo saarka beeraha, waxa uu Xisbiga UCID dib u soo noolaynayaa mashaariicdii ay ka midka ahaayeen

Wajaale, Xaaxi, Beer, iyo qaar kale oo cusubna waa la abuuri doonaa.

Xisbiga UCID waxaa uu samaynayaa Kayd qaran oo lagu ururiyo midhaha ama siidhka dalaga beeraha laguna daryeelayo caafimaadkooda, (seeds bank), si loo soo celiyo dhammaan dalagii asalka ahaa ee dalka ka bixi jirey, loona kobciyo wax-soo-saarka manfaca leh ee dhinaca beeraha.

### 5.1.4 **Horumarinta Xeebaha**

Waxa aannu, dib-u-dhis ku samaynaynaa dekedaha yar yar ee dalka iyo xeebaha si loo helo wax-soo-saar kalluun oo hor leh iyo wax-dhoofin balaadhan, dekedaha yar yar ee aannu wax ka qaban doono waxaa ka mid ah; Lawyo-cado, Saylac, Lughaya, Buluxaar, Berbera, Ceel-deraad, Onqor, Karin, Shalcaw, Xiis, Maydh, Xarshaw, Waqadariya, Laasqorey iyo Ceelaayo; xisbigu waxaa uu maal-galin u raadinayaa kuna sameynayaa dekedaha dalka, iyadoo dekeda Berbera laga dhigo doono dakad casriya oo la tartanta dekadaha mandaqada, laguna kordhin doono goobo ganacsi oo xor ah (free trade zones) is la markaana ay faa'iideystaan wadamada Bariga Afrika ee aan badda lahayn, una noqoto iridii laga galayey wadamada Afrika.

## 5.2 **Nidaaminta iyo xoojinta Bangiga Dhexe**

Bangiga dhexe waa laf-dhabarta dhaqaalaha dalka, waxaanu mas'uul ka yahay hagida iyo habaynta shuruucda bangiyada. Waxa kale oo uu mas'uul ka yahay daabacaada lacagta qaranka, kaydinta iyo maamulida lacagaha adag. Waxaa uu sidoo kale xakameeyaa sicir-bararka iyo qiimo-dhaca lacagta waddanka. Sidoo kale bangiga dhexe waxaa uu addeege iyo nidaamiye u yahay bangiyada horumarinta iyo kuwa ganacsi ee gaarka loo leeyahayba (private commercial and development banks), waxaana uu bangiga dhexe maareeyaa xidhiidhka bangiyada caalamiga ah lala leeyahay.

Haddaba maadaama muhiimada intaas le'eg iyo doorka weyn ee kor ku xusan uu leeyahay bangiga dhexe kaas oo uu dastuurka Somaliland *qoddobkiisa 13aad* xusay, waxa aannu dib-u-habeyneynaa oo tayeyneynaynaa Bangiga dhexe ee haatan jira, iyadoo shaqooyinkii iyo doorkii dhaqaale ee bangi dhexe oo qaran lahaa la siin doono, sidoo kale waxaa la dhiiri-galin doonaa sidii bangiyo ganacsi oo gaar loo leeyahay loo samayn lahaa si bangiga dhexe u ciyaari karo doorkiisii.

[5]Xisbiga UCID waxaa uu samayn doonaa sidoo kale bangigo horumarineed oo u igman xoojinta dhaqaalaha dalka.

## 5.3 Aasaaska Guddida Dhaqaalaha Qaranka

Guddidani waa mid tallo aqooneysan iyo kormeer la garab joogi doonta dhaqdhaqaaqa dhaqaalaha dalka, iyadoo daraasadeyn doonta heerarka dhaqaale ee la filayo in la wajaho, faahfaahinta guddidani waxaa lagu qeexey **qoddobka 1.3.4** ee qorshahan waxqabad.

## 5.4 Shaqo Abuuris

Waxaa lagu qiyaasaa in shaqo la'aanta shacbiga haysataa gaadhayso 90% taasina waxay saamayn weyn oo taban ku leedahay horumarka guud ee waddanka oo dhan.

Waxa aannu hiigsanaynaa oo naga go'an in aannu ugu yaraan 15% bulshada ku dhaqan gobolada shaqo gelinno (shaqo u abuurno).
Sidoo kale waxa aannu tabobar shaqo siinaynaa ugu yaraan 30% dadka shaqayn kara;
Waxa aannu la imanaynaa qorshihii ka dhabeyn lahaa yoolkaas, annagoo dhiiri-galin doona maal-gashida wax-soo-saarka dabiiciga ah iyo warshadaha (eeg kor; wax-soo-saarka), waxa aannu sidoo kale ganacsatada ku dhiiri-galinaynaa sidii loo kicin lahaa warshadihii hore u jirey, sida Warshadii Sibidhka, tii Kalluunka, Hargaha iyo Saamaha iyo abbuuritaanka kuwo cusub oo hor leh. Sidoo kale, waxa aannu samayn doonaa goobo ganacsi oo xor ah (free trade zones) iyadoo cashuurtana si caqli gal ah looga dhimmi doono goobahaas, si taasi u suurto-gashona waxaa la tayeynayaa maamulada dekedaha iyo madaarada. Dhinaca kale, mashaariicda dib-u-dhiska iyo horumarinta ah ee xukuumadu wadaa waxay shaqaaleysiin doonaan shaqaale tiro badan, iyadoo dhammaan hawl-wadeenada mashaariicdaasi noqon doonaan muwaadiniin marka laga reebo shakhsiyaad kooban oo ajaanib ah oo laga yaabo in looga baahdo aqoon farsamo ama xirfadeed.

## 5.5 Aasaaska Sanduuq Sako (Somaliland Zakat Fund Establishment)

[5] Sida Bangiga Horumarinta Xoola dhaqatada, Kalluumaysatada iyo Beeralayda kaasoo ku dhaqaaqi doona sidii bulshada ku hawlan saddexdaas wax-soo-saar ee aasaasiga ahi u horumari lahayd aqoon ahaan, farsamo ahaan iyo maaliyad ahaanba isla markaana u heli lahaayeen suuqyo ay wax-soo-saarkooda u iibgeeyaan.

Sida Diinta Islaamku ina farayso, isla markaana ay tijaabiyeen kuna guuleysteen dalal badan iyo dawlado soo marey taariikhda Islaamka, waxa Zakadu ay wax weyn ka tari kartaa daryeelka dadka baahan iyo la dagaalanka faqriga. Aasaaska iyo Hab-sami u maamulka sanduuq Zako waxaa lagu xaqiijin karaa kobcinta nolosha dadka baahan iyo yareyn xoog leh oo lagu sameeyo faqriga baahsan ee sida weyn bulshada Somaliland maanta ugu habsadey, sidaas daraadeed, waxaa aannu samayn doonaa sanduuq Zako oo madaxbanaan isla markaana ay maamulaan guddi xul ah oo ka kooban culimada diinta Islaamka, aqoonyahaniin, tujaar iyo dhallinyaro, kuwaas oo dhammaan qaybaha bulshada metelaya. Xisbiga UCID waxaa uu aaminsan yahay in haddii si waxtar leh loo abaabulo loona maareeyo sanduuqaas Zako (oo kaliya) uu faqrigu si weyn hoos ugu dhacayo muddo 10-sannadood gudaheeda, isla markaana daryeelka bulshada dhaqaalahoodu liitaa uu kor u kici doono; iyadoo laga faa’iideysanayo diinteena xaqa ah ee waajibisey Sakada iyo aqoonta culimadeena diinta ayaa xisbigu ku dhaqaaqi doonaa sidii sanduuqaas sako u noqon lahaa mid taabo gal ah oo awood u leh inuu kaallin mug leh ka qaato yareynta saboolnimada iyo horumarinta dhaqaale ee Somaliland.

## 5.6 Tayeynta Hay’ada Shaqaalaha Qaranka

Waxaa aannu dib-u-habayn iyo tayeyn laxaad leh ku samayn doonaa Hay’ada Shaqaalaha Qaranka iyadoo la siin doono doorkeeda muga leh ee dastuurka Somaliland xusay; hay’adani waxay noqon doontaa mid ku foogan tayeynta shaqaalaha dawladda; hadii ay tahay tabobarkooda, darajo siintooda, daryeelkooda iyo dhiiri-galintoodaba.

Dhinaca kale waxa aannu sameynaynaa hay’ad madax-banaan oo u dooda xuquuqda shaqaalaha. Hay’adani waxay noqoneysaa hay’ad guud oo ka shaqeysa danaha shaqaalaha sida mushaharka, fasaxyada, dalacaada, tabobarada, hawl-gabka shaqaalaha dalka; Hay’adan waxaa lagu magacaabi doonaa Komishanka Shaqaalaha Dalka (National Labour Commission)

Waxa aannu dhinaca kale, samaynaynaa kaydka xogaha xirfadaha shaqaalaha (skills bank), halkaas oo lagu diiwaan-gelin doono maskaxda toolmoon iyo aqoonta dadweynaha, iyadoo taas lagaga maarmi doono in khibrad dibadeed la raadiyo iyadoo mid taas la mid ahi dalka ku sugan tahay ama ay ku jirto muwaadiniinta aqoonta leh ee reer Somaliland.

## 5.7 La dagaalanka Musuqmaasuqa (zero-tolerance anti corruption policy)

Musuqmaasuqu waa cadawga 1aad ee horumarinta dhaqaalaha bulshada iyo guud ahaan horu-socodka dalka. Sidaas daraadeed, xisbiga UCID waxaa ka go’an hirgalinta siyaasad aan u dul-qaadaneyn musuqmaasuq heer kasta oo uu taagan yahay.
Waxa aannu abbuuraynaa hay’ad la dagaalanta musuq-maasuqa, si ay arrimahaasi u fududaadaana waxaa xoojin ballaadhan lagu sameyn doonaa Xisaabiyaha guud iyo Hantidhawrka qaranka.

Xisbiga UCID waxaa uu ballanqaadayaa in hay’adaha dawliga ahi noqdaan qaar ka nadiif ah musuqmaasuq, wax-is-daba marin iyo xatooyo hanti qaran si dawladda Somaliland u noqoto mid sumcad leh oo xushmeyn iyo qadarin ku dhex leh bulshadda caalamka, laguna soo dhiirado in lala macaamilo, la taageero isla markaana dalkeeda la maal-gashado.

## 5.8 Dib-u-habeynta Nidaamka Cashuuraha dalka

Xisbiga UCID waxaa uu aaminsan yahay in hanaanka haatan cashuuraha dawladda loo qaadaa uu yahay mid aan caddaalad ku dhisneyn, kuna sallaysneyn siyaasad isku xidhan oo cashuur bixiyeyaasha lagu wada gaadho, isla markaana qasnada dawladda lagu soo wada gaadhsiiyo dhammaan lacagtii cashuuraha laga helay dhinaca kalena sidii la rabay aanay ugu noqon muwaadiniinta waxna loogu wada qaban balse in badani ku lunto xatooyo iyo wax-is-daba marin laxaad leh oo dakhliga cashuuraha lagula kaco laga soo bilaabo marka cashuur-bixiyeha laga qaado ilaa inta ay gaadheyso keydka ugu dambeeya iyadoo aan lahayn nidaam xisaabeed lagu kalsoonaan karo.
Sidaas daraadeed, waxa aannu samaynaynaa nidaam casriya oo cashuuraha waddanka lagu maamulo, si dakhliga dalku u kobco, isla markaana aan loo lunsan loona heli karo nidaam cusub oo cashuureed kaas oo la jaanqaadi kara kobcinta dakhliga dawladda iyo horumarka ganacsiga madaxa banaan.

Waxa aannu soo celin doonaa kalsoonidii dadweynuhu ku qabay dawladda iyo addeegyada lagu maalgaliyo cashuurtooda, sidoo kale, waxa aannu curinaynaa barnaamijyo xoog leh oo dadweynaha lagu barayo wadaniyada, waajibaadka saran muwaadiniinta iyo sida ay lama huraanka u tahay in ay bixiyaan cashuurta si qarankoodu u taabo galo isuna bixiyo.

# ADDEEGA BULSHADA (Social Service)

## 6.1. Horumarinta Caafimaadka Guud

Xisbiga UCID waxaa uu Caafimaadka u arkaa baahiyaha madhaafaanka ah ee dawladdu u igman tahay; Xisbiga UCID waxaa himiladiisu tahay in qof kasta oo reer Somaliland ahi helo addeeg caafimaad oo tayo leh, iyada oo yoolka xisbigu yahay in la helo caafimaad qiimihiisu jaban yahay. Waxa aannu ku hamiyeynaa in aannu daboolno baahida caafimaad ee haatan jirta. Xisbiga UCID waxaa ka go'an suggida iyo tayeynta addeega caafimaad ee dalka. Iyadoo xisbiga UCID uu isbeddel dul iyo hoos ah ku samayn doono caafimaadka Somaliland (changing context of Somaliland health), si taas loo helona waxa xukuumada UCID galin doontaa miisaaniyada qaranka 20% caafimaadka dalka, waxaaney hirgalin doontaa sidoo kale *qoddobka 17aad* ee dastuurka dalka oo waajibanaya ilaalinta iyo kobcinta caafimaadka qaranka.

Waxa aannu ku dhaqaaqi doonaa in dib-u-eegis iyo kaabid lagu sameeyo xeerarka caafimaad ee waddanka ka jira iyadoo kuwo cusubna la curin doono, sidoo kalena dib-u-qaabeyn iyo tayeyn xoog leh lagu samayn doono Wasaarada Caafimaadka isla markaana dad aqoon sare iyo hawl-karnimo leh loo dhiibi doono hoggaaminteeda.
Si loo sugo caafimaadka guud ee muwaadiniinta, waxaa la raaci doonaa afar stratijiyadood oo qeexan isla markaana isku xidhan ayna lama huraan tahay in la wada qaato sida hoos ku qoran:

1) Ka hor taga cudurada keena dhimashada xad dhaafka ah, bukaanka iyo naafawga, guud ahaan muwaadiniinta, gaar ahaana dan yarta iyo inta aan addeega caafimaad gaadhin (Reducing the diseases that cause excess mortality, morbidity and disability especially in poor, rural and marginalized population )

2) Kor-u-qaadida hab-nololeedka caafimaadku ku jiro iyo hoos-u-dhigida arrimaha khatar galin kara caafimaadka kuwaas oo ka iman kara dhinaca deegaanka; dhaqaalaha iyo hab-dhaqanka bulsheed (Promoting healthy lifestyles and Reducing risk factors to human health that arise from environmental, economic, social and behavioural causes)
3) Samaynta hab caafimaad ku dhisan sinaan, kana jawaaba baahida caafimaad ee ay dadweynuhu xaqa u leeyihiin in loo qabto isla markaana la jaanqaadaya haynta bulshada oo ku sallaysan qiimo-lacageed suurto-gal ah (Developing health systems that equitably improve health outcomes, respond to people's legitimate demands, and are financially fair)
4) Dejinta iyo hirgalinta siyaasad iyo jawi caafimaad oo la jaan qaadi kara nolosha dhaqan-dhaqaale iyo deegaan ee bulshadda reer Somaliland (Framing an enabling policy and Creating an institutional environment for the health sector that is effectively compatible with the social, economic, environmental and development policies)

Haddaba iyadoo laga duulayo istiraatijiyadaha kor ku xusan ayaa xisbiga UCID ku dhaqaaqi doonaa tallaabooyinkan soo socda:

- **Horumarinta iyo tayeynta hawl-wadeenada caafimaadka:** Xisbiga UCID waxaa uu tayeyn doonaa isla markaana casriyeyn doonaa xarumaha barashada caafimaadka ee haatan jira, waxa aannu maal-galineynaa kulliyadaha caafimaadka ee jaamacadaha iyadoo aannu ka dhigi doono xarumo ardaydu u hoydaan (boarding medical university schools), tallaabadan waxa aannu ku xaqiijin doonaa soo saarista dhakhaatiir tiro ahaan iyo tayo ahaanba sareeya oo la jaanqaadi kara qorshaha caafimaad ee dalka.
  Sidoo kale, waxa aannu tabobar iyo tayeyn aqooneed ku sameyn doonaa hawl-wadeenada caafimaad ee imika ka hawl-gala dalka, iyadoo aannu gobol kasta ka aasaasi doono **dugsi** tabobarta kal-kaaliyeyaasha caafimaadka (nursing school), waxa kale oo aannu gobol kasta ka dhisi doonaa **guddi** caafimaad oo xul ah kana kala socda bulshada qaybaheeda kala gadisan (regional health boards), guddiyadaas oo si toos ah ula shaqeyn doona Wasaarada Caafimaadka.
  Waxa aannu sameyn doonaa guddi dhakhaatiir iyo kalkaaliyeyaal caafimaad oo degaamada dalka oo dhan ku wareega (**mobile health unit**), kuwaas oo isugu jira dhakhaatiir aqoon kala duwan leh sida dhakhaatiirta dadka, xoolaha iyo deegaanka.

- **Aasaaska Guddida Khubarada Caafimaadka (Health Professionals Commission):**

Waxa aannu aasaasaynaa Guddi heer qaran ah oo xirfadleyaasha caafimaadka mideeya, guddidani waxay ka shaqeyn doontaa tayeynta caafimaadka dalka iyo ilaalinta waxqabadka caafimaad ee dalka (health service), shaqooyinka guddidan waxaa ka mid noqon doona diiwaan-galinta xirfadleyaasha caafimaad, kormeerka caafimaadka dalka, bixinta liisanada dhakhaatiirta, kalkaaliyeyaasha iyo xarumaha caafimaadka, iyo sidoo kale ilaalinta anshaxa caafimaad ee loo baahan yahay.

- **Aasaaska Xarun Caafimaad oo gobol kasta laga hirgaliyo iyo Tayeynta kuwii hore:**
  Waxa aannu gobol kasta ka aasaaseynaa **xarun caafimaad** oo casriya una dhan yihiin agabkii, addeeggii iyo daawooyinkii dabooli lahaa baahida caafimaad ee gobol kasta; cisbitaal kasta oo haatan jirana waxaa lagu samaynayaa tayeyn xoog leh. Waxa aannu gobolada dalka ka dhiseynaa cusbitaalo guud una dhan yihiin agabkii, dawadii, dhakhaatiirtii iyo nafaqadii loo baahnaa, cusbitaaladani waxay yeelan doonaan qaybo lagu daryeelo dadka maskaxda wax ka qaba.

  Sidoo kale, waxa aannu tuullo kasta iyo degmo kastaba ka aasaasaynaa **xarun xanaano** (MCH) iyada oo aannu kuwii hore u jireyna dib-u-dhis, qalabayn iyo tayaynba ku samayn doono. Xarun kasta oo caafimaad waxaanu u dhammeystiri doonaa dhammaan agabkii, dawadii, hawl-wadeenadii iyo dhakhaatiirtii looga baahnaa. Sida ay qireen Wasiirada Caafimaadka ee Dunnidu mar ay shir ku yeesheen magaalada Addis Abbab dhammaadkii bisha October, 2009, waxaa dalalka Afrika oo Somalilandna ku jirto u dhinta fool-raac iyo xanuuno haleela dumarka marka ay uurka leeyihiin kumanaan hooyooyin ah, iyaddoo qaramada midoobeyna tabarucdey lacag tirro badan oo arrimahaas wax lagaga qabanayo, ayaa xisbiga UCID ay ka go’an tahay in uu yareeyo cudurada faafa (coomunicable diseases) isla markaana wax ka qabto hooyooyinka umul-raaca iyadoo laga faa’iideysanayo isla markaana si wanaagsan loo maareynayo lacagaha tirada badan ee caafimaadka ay ku bixiyaan dalalka dunnidu.

- **Aasaaska Hay’ada ka hortaga cudurada faafa:**
  Waxa aanu qaabeyn doonaa hay’ad la yidhaahdo Hay’adda ka hortaga cudurada faafa (Somaliland National Agency against Contagious Diseases), hay’adan waxay ka shaqeyn doontaa ka hortaga cudurada faafa, sida HIV/AIDS, TB, Hepatisis, Jabtida iyo Xabada, iwm. Xisbiga UCID waxaa uu aad uga warwarsan yahay sida ba’an ee cuduradan kor ku xusani u faafayaan, sidaas daraadeed, waxaa naga go’an sidii aanu olole caafimaad oo hor

leh ugala hortagi lahayn cuduradaas iyo sidoo kale sidii loo daraaseyn lahaa xanuunada u badan ee bulshada waayahan dambe asiiba iyo waxyaabaha xal waxtar leh u noqon kara.

### 6.1.2 Caafimaadka Xoolaha

Maadaama xooluhu ay yihiin lafdhabarka dhaqaalaha waddanka, waxa aannu xoojinaynaa daryeelka iyo xannaanaynta xoolaha nool iyada oo aannu xoogga saarayno hubinta caafimaadkooda (certification), tayaynta xoolaha iyo horumarinta nafaqadooda.

Xisbiga UCID waxaa uu xoojinayaa maxjarada haatan jira isagoo samayn doona marjaro hor leh iyo hoy dhexe oo lagu baadho nolosha iyo caafimaadka xoolaha isla markaana lagu darso sidii xoolaheena loo horumarin lahaa. Sidoo kale, wuxuu xisbigu samayn doonaa [6]**bangi u gaar ah horumarinta xoolaha iyo kheyraadka badda.**

### 6.1.3 Ilaalinta Tayada Baddeecadaha

Waxaanu samaynayaa hay'ad hubisa tayada badeecdaha dalka soo gelaya iyo kuwa dalka lagu sameeyaba sida cuntada, dawooyinka dadka, xoolaha iyo dhirta (Quality Control Commission), xisbiga UCID waxaa uu aaminsan yahay in caafimaadka dadka, xoolaha iyo deegaanka Somaliland khatar ku jiro haatan maadaama aanay jirin cid hubisa waxyaalaha la cuno ama la isticmaalo ee dalkeena soo gala. Sidaas daraadeed, si loo ilaaliyo fayoobida dadka, xoolaha, dhirta iyo deegaanka dalka waxaa si nidaamsan loo baadhi doonaa tayada dhammaan waxyaalaha lasoo dejiyo iyo kuwa lagu farsameeyo dalka gudihiisa.

### 6.1.4 Xoojinta Tayada Waaxda Fayo-Dhawrka Iyo Nadaafada

Waaxdani waxa ay ka shaqanaysaa nadaafada guud iyo fayo-dhawrka dalka. Waxa ay xakamayn doontaa wixii wax yeelo u gaysanaaya bay'ada guud (qashinka, bulaacadaha iwm)
Maadaama nolosha iyo caafimaadkuba ku xidhan yihiin nadaafada iyo fayo-dhawrka, xisbiga UCID waxaa uu dejin doonaa siyaasad wax ku ool ah oo waaxdan lagu tayeynayo, isla markaana dib loo soo nooleynayo hawlihii waaxdani qaranka u hayn jirtey, waxaana

[6] Waxa la abuuri doonaa Bangiga Horumarinta Xoolaha, Beeraha iyo Kheyraadka Badda, kaas oo ka shaqeyn doona kobcinta wax-soo-saarka xoolaha, beeraha iyo kheyraadka badda ku jira, faahfaahinta bangigan waxay ku qeexan tahay **qoddobka 4.1.3** ee Kobcinta Dhaqaalaha

waaxdani la wada shaqeyn doontaa wasaarada caafimaadka, dawladaha hoose, ururada bulshada iyo guddiyada dadweynaha.

## 6.2 WAXBARASHADA

Sida ku cad maba’diida Xisbiga UCID iyo dastuurka qaranka *qoddobkiisa 15 aad, farqadaha 1, 2 iyo, 3,* waxaa naga go’an horumarinta iyo xoojinta waxbarashada dalka Somaliland; waxa aannu galinaynaa miisaaniyada dalka 20% ka mid ah addeegyada waxbarasho ee waddanka, annagoo waxbarashada dalka muddo kooban gudaheed ku samaynayna kor-u-qaadis iyo horumarin laxaad leh isla markaana gaadhsiineyna heerarka ay joogto waxbarashada dalalka horumarka sameeyey.

Xisbigu wuxuu dhaqaaqi doonaa in loo helo waxbarasho ilmo kasta oo reer Somaliland ah, isla markaana qasab laga dhigo waxbarashada ilaa heerka hoose/dhexe ee fasalka sideedaad; xisbigu wuxuu u taagan yahay sidii loo hirgalin lahaa waxbarasho kazoo jeeda dhaqanka diinta Islaamka taas oo qofka ka dhisaysa dhinaca islaam ahaan, qof ahaaneedba isla markaana qofka ka dhigaysa mid horumarsan, aqoon u leh nolosha fiican iyo habka fiican lagula noolaado mujtamaca xaqoodana lagu ilaaliyo laguna guto waajibka qof kasta saaran. Waxa aannu hirgalineynaa waxbarasho ku sallaysan wax-soo-saarka iyo tiknoolajiyada cusub.

Waxa la kala saari doonaa dugsiyada wiilasha iyo gabdhaha, waxaanna si siman wax loo bari doonaa wiilasha iyo gabdhaha.
Si loo helo waxbarasho tayo leh oo dalkoo dhan wada gaadha, isla markaana soo saarta jiil caqiido Islaamiya leh, aqoon iyo xirfad sareysana ku dheehan tahay, isla markaana garaad ahaan iyo ruux ahaanba dhisan (spiritually and intellectually constructive), waxa aannu qaadi doonaa tallaabooyinkan soo socda:

- **Wax-ka-beddelka iyo kaabida nidaamka waxbarasho ee dalka:**
  Waxa aannu wax-ka-beddel balaadhan ku samayn doonaa manhajka waxbarasho ee dalka kaas oo lagu sallayn doono diinta, dhaqanka iyo himilada horumarineed ee dalka jamhuuriyada Somaliland. Sidoo kale, waxa aanu dib-u-habeyn farsamo ku samaynaynaa qaab-dhismeedka iyo mas’uuliyadaha xafiiska manaahiijta iyo immtixaanaadka qaranka (Somaliland National Curriculum, Examination and Certification Board), waxa aannu sidoo kale dib-u-habeyn weyn ku samaynaynaa guud ahaan nidaamka waxbarasho ee dalka si loo helo waxbarasho iyo tarbiyeyn isku xidhan, tayo leh isla markaana dhiiri-galineysa

horu-socod laxaad leh oo qaran. Sidoo kale, waxa aannu xooga saareynaa aqoonta Af-soomaaliga iyo suuggaanta taas oo lagu xoojin doono dhammaan ardeyda dalka wax ku barata heer kasta oo ay yihiin, si dhaqankooda iyo hidahoogaba aqoon ugu yeeshaan.

- **Nidaaminta Hay'adaha waxbarasho ee dalka:**
  Waxa aannu ka dhigaynaa iskuulada dawladda lacag la'aan ilaa heer dugsi dhexe/sare, iyada oo aannu ballanqaadayno in gobol kastaa helo waxbarasho ka wanaagsan tan haatan jirta. Xisbiga UCID waxaa uu xoojinayaa tabobarka macalimiinta heer kasta oo ay yihiin.
  Xisbiga UCID waxaa uu wasaarada waxbarashada ee haatan jirta u baddalayaa Wasaarada Waxbarashada, Barbaarinta, Tacliinta sare iyo Cilmibaadhista taas oo haggi doonta siyaasada waxbarashada ee dalka.

  Xisbiga UCID waxa uu jaamacadaha iyo tacliinta sare ee waddanka ka jira u fidinayaa taageero dhaqaale oo ay ku sameeyaan cilmi-baadhisyo; waxa aannu dhiri-galineynaa jaamacado iyo xarumo cilmibaadhiseed oo hor leh, sidoo kale waxaa uu xisbiga UCID si weyn xooga u saarayaa samaynta kuliyaddo iyo machadyo farsamo iyo mihnadeed oo heer sare ah kuwaas oo waxbara tirada ugu badan ardeyda dugsiyada sare ka baxda.

  Xisbiga UCID waxaa uu qorsheynayaa tirada iyo tayada xirfada iyo aqoonta dalku u baahan yahay iyadoo la dhiiri-galin doono soo saarista aqoonyahaniin muwaadiniin ah oo ku kala takhasusey caafimaadka, dhaqaalaha iyo ganacsiga, aqoonta IT-ga ee casriga ah, culuumta kheyraadka iyo beeraha, culuumta shareecada iyo taariikhda Islaamka, iwm.

## 6.3 SIYAASADA BIYAHA EE XISBIGA UCID

Somaliland dad aad u tiro yar ayaa caba biyo nadiif ah isla markaana si toos ah u hela, xisbigu waxuu dibu-habayn ku samaynayaa maamulka iyo maaraynta xarumaha biyaha, waxaanu ka dhigayaa hay'ad ay wada maalgashadaan dawlada iyo dadwaynahu (**PPP**).
Waxa aannu dib u eegis buuxda ku samanaynaa xogaha dhabta ah ee ku wajahan biyaha dalka, si loo xoojiyo adeegyada biyaha ee hadda jira, loona sahamiyo hab-biyood balaadhan oo gaadha miyo iyo magaaloba.

Si taasi u suurto gasho waxa aannu dhisi doonaa Hay'ada Horumarinta Biyaha Somaliland, taas oo ka shaqeysa samaynta biyo-qabatimo, ceel-biyoodyo dhaadheer iyo kuwo gaagaaban. (water sources). Sidoo kale waxaanay dayac-tir joogta ah iyo ballaadhin ku samaynaysaa ceelasha biyaha ee hadda jira.

## 6.4 SIYAASADA KORONTADA EE XISBIGA UCID

Waxaanu balan qaadaynaa in aannu xoojino tamarta korantada si miyi iyo magaaloba loo helo koronto ku filan. Taas oo muhiim u ah horumarinta dhaqaale iyo wershedaynta dalka. Xisbugu waxa uu abbuuri doonaa ilo cusub oo laga sameeyo tamarta korantada, sida dabaysha, cadceeda iwm. Waxa aannu midayn doonaa siyaasada maamulka korontada dalka si dalkoo dhan loo gaadhsiiyo koronto, taas oo dawlada iyo dadweynuhuba iska kaashan doonaan, waxaana ay arrintaasi wax weyn ka tari doontaa warshadeynta waddanka.

## 6.5 DARYEELKA BULSHADA

Sida ka muuqata magaca xisbiga UCID, waxa aannu ballan qaadaynaa sidii qaranka JSL u noqon lahaa qaran daryeela dadkiisa jilicsan, waxa aannu ku dhaqaaqaynaa siyaasadii suurto-galin lahayd in caddaalada, addeegyada bulshada iyo daryeelka la gaadhsiiyo muwaadiniinta.

### 6.5.1 Daryeelka Naafada, Agoomaha iyo dadka da'da ah

Waxa aannu balanqaadaynaa in aannu daryeelno naafada, agoomaha iyo dadka da'da ah ee reer Somaliland wixii awoodu saamaxdo siiba naafadii iyo agoomihii halgamayaashii SNM. Si taasi u suurto gashana waxaa aannu xoojin iyo taageero xoog leh oo maaliyadeed iyo farsamaba u fidineynaa jimciyada mujaahidiinta SNM ee SOOYAAL.

Waxa kale oo aannu ku dhaqaaqeynaa sidii tariikhdii halgamayaashii reer Somaliland oo dhan loo suggi lahaa looguna dari lahaa manhajka waxbarasho ee dalka isla markaana goobo xasuuseed loogu sameyn lahaa.

Dhinaca kale, masuuliyadaha xukuumada UCID waxa ka mid noqon doona daryeelka dadkeeda gaar ahaan kuwa baahiyaha khaaska ah leh sida dadka da'da ah ee aan cid daryeesha lahayn iyo naafada.

Xisbiga UCID waxa uu waxqabad toos ah u fidinayaa dadka naafada ah nooc kasta oo ay yihiin isaga oo ka caawinaya dhinacyada waxbarashada, caafimaadka iyo shaqaalaynta. Waxa kale oo uu xisbigu naafadda siin doonaa kaallin cuddoon oo maamul isaga oo wax-ka-beddel ku samaynaya dhammaan [7]xeerarka iyo shuruucda caqabadaha ku ah horumarka iyo dhiirigelinta naafada.
Xisbiga UCID sidoo kale, waxa uu si gaar ah u dhaqaalayn doonaa dadka tamarta gabay ama da'da ah.

### 6.5.2 Horumarinta Dhallinyarada (Gabdho Iyo Wiilal)

Waxaanu aaminsanahay in dhallinyaradu tahay mustaqbalka iyo lafdhabarta jiritaanka iyo horumarka Somaliland iyaga oo ah quwadda ugu weyn ee samayn karta isbeddel wax ku ool ah.

Waxa aannu ballan-qaadaynaa in ay helaan dhalinyaradu barnaamijyo horumarineed oo u diyaar-garaynaya inay hantaan hoggaanka siyaasadda ee dalka, si ay taasi ugu suurto-gasho waxaa uu xisbiga UCID ka taakuleyn doonaa dhaqaalaha, farsamada iyo inay aqoon sare helaan.

Xisbiga UCID waxa ka go'an oo uu ballanqaadayaa in dhallinyarada dalka laga qayb-galiyo hanaanka siyaasada iyo golayaasha go'aan-qaadashada dalka, iyadoo caqliga iyo cududa dihin ee da'yarta lagu xoojin doono hay'adaha xukuumada. Waxa sidoo kale dhallinyarada laga qayb galin doonaa golaha wasiirada xukuumada UCID.
Waxa aannu sidaas daraadeed ku dedaalaynaa sidii dhallinyaradu u noqon lahayd quwada lagu dhaqaajiyo horumarka iyo taabo-gelinta qaranka Jamhuuriyada Somaliland.

Wuxuu xisbigu horumarin ku samayn doonaa ciyaaraha dalka, iyaddoo la curin doono siyaasad ballaadhan oo ciyaaraha kala duwan ee dhallinyaradda lagu adkeynaayo, waxaana la kaashan doonaa khubaro muwaadiniin ah oo arrintaas wax ka yaqaana. Xisbigu wuxuu dayac-tirri doonaa garoomadda ciyaaraha ee haatan jira iyaddoo qaar cusubna la dhisi doono; muddada shanta sanno ah waxaa gobol kasta laga dhisi doonaa garoono waaweyn isuguna jira noocyada kala gadisan iyo sidoo kale kuwo yar yar.

[7] Waxa aannu meesha ka saari doonaa qoddobka odhanaya in qofku si uu u shaqo gali karo jidh ahaan dhammeystirnaado.

UCID waxa uu xirfado u abuurayaa dhallinyarada iskuullada dibedda ka joogta waxaana loo samaynayaa xirfado ay ku shaqaystaan. Xisbigu waxa uu mudnaanta siin doonaa fursadaha shaqo dhallinyarada waddanka.

Xisbigu waxa uu dhallinyarada u samaynayaa xarumo cilmi iyo bulsho (community centres) kuwaas oo ay kaga maarmaan balwadaha wuxuuna si gaar ah u gacan qaban doonaa ururrada dhallinyarada. Waxa aannu ballan qaadaynaa in aannu dhiiri gelino guurka dhalliyarada anagoo ka saacidi doona dhinacyada dhaqaalaha, farsamada iyo abaabulka isla markaana sannad kasta gobol kasta ka agaasimi doona aroos wadareedyo waafaqsan diinteena iyo dhaqankeenaba.

Xisbiga UCID waxaa uu dib-u-nidaamin iyo siyaasad shaqo u sameyn doonaa ururada dhallinyarada, si uu waxtarkoodu u sugmo isla markaana ay qayb uga noqdaan dedaalka horumarineed ee qarankan. Waxaa UCID ka go’an inay fuliso qoddobada dastuuriga ah ee damaanad qaadaya daryeelka dhallinyarada, isla markaana ka shaqeyso sidii loo furdaamin lahaa caqabadaha sharci ee hor taagan sida qoddobka sheegaya 35-jirka. Sida xisbiga UCID haatan ugu tamariyo awooda dhallinyarada ayaa dawlada UCIDna ku tamarin doontaa cudduda iyo caqliga dhallinyarada dalkeena.

### 6.5.3 Kobcinta Iyo Daryeelka Haweenka Jsl

Waa xaqiiqo lama-dhaafaan ah in haweenku yahay asaaska bulsho kasta. Sidaa darteed xisbiga UCID waxa uu garawsan yahay oo aaminsan yahay in haweenka Somaliland yihiin halbawlaha nolosha iyo nabadda Somaliland ka jirta horena qaybta ugu weyn uga soo  qaateen nabadaynta iyo horumarinta dalka.

Sidaa darteed, xisbigu waxa uu ahmiyad u qalanta siin doonaa ururrada haweenka ee heer walba si loo sii kordhiyo waxqabadka ay u hayaan dalka. Waxa kale oo xisbigu xoogga saarayaa xirfadaha shaqo iyo baayac-mushtar ee haweenka u gaarka ah. Xisbigu wuxuu haweenka u samaynayaa xarumo iyo naadiyo cilmi iyo bulsho u gaar ah oo ay hawlahooda ku qabsadaan. Xisbiga UCID waxaa uu warbaahinta qaranka uga faa’iideysan doonaa sidii loo wacyi-galin lahaa, jiheyn lahaa isla markaana wax loo bari lahaa haweenka iyo caruurta guryaha ku suggan.

Xisbigu waxa uu si gaar ah u korinayaa kaalinta haweenku kaga jiraan siyaasadda shaqadda, maamulka iyo waxbarashadda; si taas loo helona waxa aannu haweenka kaalin mug leh ka siin doonaa maamulka dalka, sida goleyaasha xukuumada, deegaanka, gobolada iyo guddiyada dalka. Waxa aannu aaminsanahay in haddii garaadka, aqoonta iyo fikirka haweenka la kobciyo, la heli karo bulsho toosan oo kasoo jeeda qoysas wanaagsan una dhisan ruux ahaan iyo aqoon ahaanba (spritual and intellectual), sidaas daraadeed xisbiga UCID waxaa uu ballanqaadayaa in uu siyaasad dhammeystiran oo daryeelka iyo horumarinta haweenka JSL lagu suurto-galiyo.
Xisbiga UCID waxaa uu ballanqaadayaa inuu la yimaado qorshe shan sannadood gudahood kaalmo dhaqaale oo waxtar leh loogu fidinaayo haweenka waddooyinka fadhiya ee iibiya qaadka, shaaha iyo kuwa sida caanaha la wareega oo iyaga la darsi doono hab ka casriyeysan, kana fudud kan ay haatan caanaha ku iibiyaan, haweenkaasi guud ahaan waxay biiliyaan caruurta ay dhaleen oo agoon ah amaba aabahood gabay kaalintiisii. Qorshahani waxaa uu xaqiijin doonaa muddo shan sanno ah gudahood in la waayo gabadh reer Somaliland ah oo uiyadoo u xoogsanaysa caruurteeda, qaad waddada ku iibinaysa. Waxaa isla markaas suurto-gali doonta in haweenkaasi ay ka ganacsadaan waxyaalo kale si ay uga helaan noloshooda (small scale businesses/investments)

### 6.5.4 Daryeelka Iyo Horumarinta Dadka La Haybsooco

Bulshada Somaliland waxa heeryo culus ku ah hab-dhaqanka lagula kaco dadyawga la hayb-sooco. Waxaanu aaminsanahay in loo baahan yahay isbeddel fikriya oo xiddidada loogu siibayo aafadan bashariga ah ee lagula dhaqmayo dad inaga mid ah. Sidaa darteed, Xisbiga UCID waxa uu samaynayaa xeerar wax lagaga qabanayo nooc kasta oo hayb-sooca. Waxa xisbigu xoogga saarayaa sidii kor loogu qaadi lahaa taageerada dhinacyada waxbarashadda, shaqaalaynta iyo ka-qaybgalinta tallada waddanka.

Xisbiga UCID waxaa uu bulshada la haybsooco ka qayb-galin doonaa golaha xukuumada, ilaa heer wasiir, dhinaca kale waxa aannu saami ka siinaynaa dhammaan guddiyada dalka, sida xafiisyada maamulka gobolada iyo hay’adaha kale ee dawladda. Waxa aannu ku dhaqaaqeynaa sidii bulshadan looga qayb-galin lahaa dhammaan dhinacyada tallada dalka; hay’ad kasta oo xukuumadeed waxaannu ka siin doonaa saami iyagoo qaybtooda ku yeelan doona shaqaalaha dawladda. Dhinaca kale, waxa

aannu maal-galin iyo dhiiri-galin weynba la garab istaagi doonaa iskaashatooyin iyo shirkado farsamo oo loo sameeyo bulshadan, kuna soo saaraan xirfadooda iyo wax-soo-saarkooda ay aqoonta u leeyihiin. Si looga maarmo alaabta dibada laga soo waarido.

Xisbiga UCID waxa uu ballanqaadayaa inuu deeq waxbarasho oo gaar ah siiyo bulshadan taas oo taxan heer-dugsiyo hoose ilaa heerar jaamacadeed iyo takhasusyo sare.

Waxa aannu sidoo kale, dib-u-dhis iyo addeeg bulsho oo weyn ku samayn doonaa dhammaan deegaamaday degaan bulshadani, anagoo siin doona waxbarasho iyo wacyi-galin dheeriya taas oo lagaga raaridayo xuquuqdooda buuxda iyo siday horumar weyn u hiigsan lahaayeen.

# 7. SIYAASADA ARRIMAHA DIBADA IYO ISKAASHIGA CAALAMIGA AH

Xisbiga UCID waxaa ka go’an oo uu ballanqaadayaa in uu dalka ku hago siyaasad arrimo dibadeed oo furfuran isla markaana la jaanqaadi karta qiyamka ummada, horumarinta dalka iyo xidhiidhka bulshada caalamka sidoo kalena waafaqsan dastuurka qaranka *qoddobkiisa 10aad.*

Siyaasada Dibeda ee xisbiga UCID waxay ku sallaysan tahay wax wada qabsi, sinaan iyo isfara-galin la’aan.

Xisbiga UCID waxa uu hirgalin doonaa siyaasad dibadeed oo qeexan khaas ahaan siyaasad ictiraaf-raadineed, (Road-map) oo jeexi doonta jidkii looga midho-dhalin lahaa aqoonsi buuxa oo dalkani gaadho;

- Xukuumada xisbiga UCID waxay xoojin doontaa xidhiidhka iyo iskaashiga dawladaha geeska, bariga afrika iyo guud ahaan qaarada Afrika.
- Xukuumada xisbiga UCID waxay bilaabi doontaa siyaasad cusub oo ay kula dhaqanto dunnida carabta iyo waddamada Islaamka ah.
- Waxaa hubaal ah in aan si dhab ah looga hawl galin abaabulka qurbajooga Somliland; xisbiga UCID waxaa uu xoojin doonaa kaalintaasi.

- Xisbiga UCID waxaa uu xooga saari doonaa waddamo gaar ah, oo aannu aaminsanahay inay si weyn u rumeysan yihiin in Somaliland la ictiraafo.
- Xukuumada xisbiga UCID waxa uu dib-u-soo celin doonaa xidhiidho hore waddankani u lahaa oo lumay, adkayntoodana aan laga hawl galin.
- Xukuumada xisbiga UCID waxaa uu si khaas ah uga ololeyn doonaa waddanada Barwaaqo Sooranka (Common Wealth Countries), oo horeba xisbigu xidhiidho xoogan ula lahaa.
- Xukuumada xisbiga UCID waxa ay ka daba tagi doontaa warbixintii ururka Afrika (AU) ka qoreen dalkeena Somaliland sannadkii 2005-tii, warbixintaasoo ka marag kacday in Somaliland ay xaq u leedahay in aqoonsi buuxa la siiyo.
- Xukuumada xisbiga UCID waxa ay hawlgalinaysaa diblumaasiyiin iyo hogaamiyeyaal caalamiya oo u hawl gali doona sidii waddankani u heli lahaa xaqa uu u leeyahay in uu kamid noqdo bulshada caalamka oo helo aqoon buuxa.

## 8. SIYAASADDA DEEGAANKA EE XISBIGA UCID

UCID waxa ka go'an ilaalinta iyo daryeelka deegaanka waxaana uu nidaamin doonaa dhul-daaqsimeedka waddanka iyada oo la dejinayo barnaamijyo deegaanka lagu dhawro oo ku dhisan aragti iyo qorshe bulshadu ay ka middeysan tahay.

Somaliland waa dal ka kooban buuro, bad, oogo iyo dhul hawd ah oo daaqsimeed, hase ahaatee dadku wali way ka qatan yihiin nimcooyinka dhulkooda iyo baddooda ku duuggan iyo ka faa'iideysiga deegaanka Illaahay (SWT) ku manaystey. Haddaba deegaan waxaa uu xisbigu ku macneynayaa waxa uu dadku ku nool yahay sida biyaha, dhulka dushiisa waxa yaala (flora and fauna), hawada, buuraha iyo wada-jirka ama isku tiirsanaanta noolaha iyo ma nooleyaasha (ecosystem)

Xisbiga UCID waxa uu si dhammaystiran u joojin doonaa jarista dhirta iyo joojinta waxyaalaha deegaanka nabaad-guuriya. Taa bedelkeeda waxa uu xisbigu abuurayaa aqoon-xirfadeed lagu

bedelo xaabada iyo dhuxusha sida dhuxul-dhagaxda, iwm. Inta laga helayo hanaan lagu baddelo xaabada iyo dhuxusha waxa uu xisbigu samayn doonaa dhir-beeris iyo kayd loo isticmaalo dheri-karinta. Waxaa kale, oo uu xisbigu dhiiri-galin doonaa dhir-beeris wadareed; sannad kasta hay'adaha arrimaha deegaanka khuseeya ee xukuumada UCID waxay beereyaan ilaa 15000 oo geed oo laga kala beerayo gobolada dalka oo dhan, iyadoo la soo celin doono dhammaan dhirtii qaaliga ahayd ee waddanka ka bixi jirtey balse haatan sii dabar go'aysa, dhir-beeristan waxaa lagu tartansiin doonaa gobolada, degmooyinka, magaalooyinka iyo tuullooyinka dalka.

Waxa aannu ballanqaadaynaa in aannu la iman doono siyaasadii iyo qorshihii lagu soo celin lahaa baadkii, doogii iyo kaymihii dalku lahaa si looga hortago xaalufka iyo nabaad-guurka, waxaana laga shaqayn doonaa sidii roobka iyo biyahan dalka, lagana hor-joogsan lahaa in biyahaasi ku qulqulaan badda kuwaas oo keena carro-guur, biyo la'aan iyo abbaaro soo noqnoqda.
Waxa kale oo aannu ku dadaalaynaa dib-u-soo celinta ugaadha iyo duurjoogta taasoo la samayn doono seero lagu ilaaliyo ugaadha iyo kaymo u gaar ah (conservation)

Xisbiga UCID waxaa uu ka qaybqaadan doonaa barnaamijyada ilaalinta deegaanka ee caalamiga ah, isagoo taageerana u raadin doona mashaariicda ilaalinta deegaanka dalkeena.

Waxa kaloo uu xisbigu hirgelinayaa barnaamijyo lagu joojinayo qulqulka ciidda iyo biyaha. Waxa aannu sidoo kale wax ka qaban doonaa jeexyada iyo boholaha si looga hortago nabaad-guurka deegaanka. Xisbigu waxa uu dib u eegayaa qaab-dhismeedka magaalooyinka si loo helo magaalooyin dhawra nidaamka iyo siyaasadda u dejisan dhawritaanka deegaanka.

Somaliland wali lama jaan-goyn dhulka daaqsinka ah iyo ka beeraha ah lamana maareyn dhulka macdantu ku jirto ee laga soo saari doono iyo dhulka dalxiiska ahba, iyadoon la samayn wax taswiir ah ama jaan-goyn ah oo lagu sameeyey tuullooyinka ama inta magaalooyinku ku eekaanayaan sannadka 2050-ka, sidaas daraadeed, waxa aannu samayn doonaa qorsheyn iyo jaan goyn dhammaystiran oo lagu sameeyo oogada dhulka Somaliland (Somaliland land surface)

## 9. SIYAASADA ARRIMAHA SAXAAFADA

Saxaafadda noocyadeeda kala duwani waxay nuxur u yihiin nolosha dawladnimo; Xorriyadda saxaafaddu waxa ay ka mid tahay xorriyaadka asaasiga ah ee dustuurka Somaliland dammaanad-qaaday.

Iyadoo la tixraacayo qawaaniinta ku saabsan warbaahinta eek u xusan distoorka iyo xeerarka saxaafada, ayaa aannu samaynaynaa gole saxaafadeed agaasima isla markaana horumariya saxaafadda waddanka si loo tayeeyo; golahani waxaa uu u taagnaan doonaa arrimahan hoos ku qoran:-

- In warbaahinta waddanku noqoto mid ku socota distoorka iyo xeerarka saxaafada

- In ayna marnaba imanin cabudhin ku timaada saxafiyiinta, si looga hor-istaago waxyaabaha ay xaqa u leeyihiin ee sharciyada dalku damaanad-qaaday
- In la helo saxafiyiin tabobar sare leh oo ka tirsan dhinaca warbaahinta dawladdu maamusho iyo tan gaarka loo leeyahayba (public and private media)

Dhinaca kale, waxa aannu si xisaabtan leh u ogolaanayaa idaacado madax-bannaan sida FMyo, isla markaana waxa aannu ballanqaadaynaa in aannu ballaadhino oo aannu tayeyno Idaacadda iyo TV qaranka si ay waddanka oo dhan ay u wadda gaadhaan.

Warbaahinta dawladdu (Radio, TV and Newspapers) waxay guud ahaanba noqon doontaa mid meel kaliya laga hago, siyaasad cad oo wadaniyana ku shaqeysa. Warbaahinta dawladda UCID waxay noqon doontaa mid umadda u tabisa warar deg deg ah oo suggan, barnaamijyo ku qotoma cilmi, wacyigalin iyo jihayn umadeed iyo madadaalo habboon waxtarna leh.

Xisbiga UCID waxa ka go'aan ah in saxaafadda qaranku u sinnaato muwaadiniinta iyo xisbiyada qarankaba; sidaas daraadeed, waxaa aannu soo afjari doonaa warbaahintii dawladda ee ku sallaysneyd rabitaanka iyo hirgalinta danaha gaarka ah ee shakhsiyaad xukuumada ka tirsan.

# 120-ka CISHO EE U HOREEYA WAKHTIGA XUKUUMADA UCID
## (FIRST 120-DAYS OF UCID GOVERNMENT TERM)

Codeeye, waxaad la socotaa in nidaamka siyaasadeed ee dalkeenu ku sallaysan yahay axsaabta badan isla markaana yahay jamhuuriyad madaxweynuhu awooda badan leeyahay (presidential republic), waxaana nidaamka sidan ah, laga

qiimeeyaa waxtarka xisbiga tallada ku guuleysta sida uu u dhaqmo bilaha hore ee ay xukuumada uu xisbigaasi soo dhisey xilka hayso.

Haddaba, Xisbiga UCID waxaa ka go'an in haddii uu tallada dalka ku guuleysto uu ku dhaqaaqo hawl iyo isu-diyaarinta ka midho-dhalinta barnaamijkiisa siyaasadeed iyo qorshihiisa waxqabad, si uu uga dhabeeyo ballanqaadkiisii, una gudo abaalkii umadda reer Somaliland u gashey ee ay kusoo xulatey.

120-ka cisho ee u horeeya, dawladda xisbiga UCID hoggaaminayaa waxay ku dhaqaaqi doontaa tallaabooyinkan soo socda:-

1. La wareegista xilka madaxtooyo (isla markaabana xukuumadii oo dhisani ay xilkii la wareegto), iyo dib-u-akhrinta ballanqaadyada qorshahan, si umadda loogu cadeeyo in aaney ballanqaadyada xisbiga UCID ahayn dhalanteed iyo arrin looga gon lahaa in kursiga umadda lagu hantiyo balse xisbiga UCID uu yahay mid u taagan ka dhabaynta horumarkii uu umadda ugu baaqayey.
2. Soo dhisida xukuumad kooban oo tayo sareysa leh, isla markaana waafaqsan qoddobka 1aad ee qorshahan waxqabad ee xisbiga UCID.
3. Dib-u-eegista iyo Sameynta Miisaaniyaddii xukuumadu ku hawl-gali lahayd sannadka 1aad.
4. Iyo sameynta guddi farsamo oo ka shaqeysa isu-duba ridka iyo hirgalinta hawlaha la fulinayo 120-cisho ee u horeeya muddada xilka.
5. Soo saarista wareegtooyin lagu baabi'inaayo guddida nabad-galyada, isla markaana ooda lagaga qaadayo dhammaan maxaabiista ku xidhan sharci darrada een dambi lagu hayn, sida kuwa u xidh-xidhan arrimaha siyaasadeed iyo dib-u-eegista maxaabiista ku xukuman dilka iyo fulintooda.
6. Qaban-qaabada iyo hirgalinta Shirweynaha Aqoonyahaniinta Somaliland, kaas oo la isugu keeni doono aqoonyahaniinta iyo waxgaradka dalka ee gudo iyo dibadba jooga, kuwaas oo dejin doona qorshaha hawleed (technical and operational plan and policies) ee xukuumadu ku hawlgali lahayd 5-sanno ee ay xilka hayso, iyadoo dib loo eegayo wixii qorshe ah ee haatan jira.
   Tallo-ka-bixinta magacaabista guddiyada dhaqaalaha, kormeerka, iwm. Shirkani waxaa uu dib-u-eegayaa qorshahan waxqabad ee xibsiga UCID iyagoo samaynaya hanaankii lagu hirgalin lahaa.


7. Magacaabista guddiyada, (Councils, Commissions, Committees and Agencies) sida Culimada, Dhaqaalaha, Kormeerka-guud, Dekedaha iyo madaarada, iwm. Iyo Dib-u-nidaaminta dhammaan hay'adaha xukuumiga ah.
8. Qaban-qaabada iyo hirgalinta Shirweynaha Ganacsatada Soomaaliyeed, iyo maal-gashedeyaasha ajanabiga ah (foriegn investors) kaas oo lagu soo jiidan doono maal-gashiga ganacsatada iyo maal-qabeenada.
9. In xukuumada ay horgayso barnaamijkeeda waxqabad oo faahfaahsan, miisaaniyada qaran, iyo maxsuulka labada shir ee kor ku xusan golaha wakiiladda JSL, si ay waajibaadkooda dastuuriga ah uga gutaan.

## GUNAANAD (Conclusion)

Ugu dambeyn, qorshahan waxqabad ee xisbiga Caddaalada iyo Daryeelka, UCID uu halkan kusoo bandhigay waa mid suurto-gal ah oo la jaanqadaya waayaha dhaqaan-dhaqaale iyo duruufaha nololeed ee bulshada iyo dalku haatan ku sugan yihiin.

Ujeedada qorshahani waa mid durugsan oon ku dabraneyn ku gaadhida kursiga madaxweynimo ee dalka balse waxay tahay badbaadinta, kobcinta iyo horumarinta umaddan JSL ee aan helin hoggaan fiican tan iyo 1960kii, maantana u baahan hoggaan karti leh iyo isbeddel togan oo ka tarjumi kara himilada umadda.

Xisbiga UCID iyo Musharixiintiisu waxay si weyn oo dhab ah u ballanqaadayaan fulinta qorshahan waxqabad ee halkan ku xusan Waxaana aannu diyaar u nahay in uu ballanqaadkani noqdo mid sidiisa u qabsooma.



# UCID

## Xisbiga Caddaalada iyo Daryeelka JSL

حزب العداله والرأفه

***We Stand For Change and Justice***

# UCID Political Platform



Murashixiinta Xisbiga Caddaadda iyo Daryeelka (UCID)
Eng. Faysal Cali Waraabe iyo Dr. Maxamed-Rashiid Sheekh Xassan

U codee Isbaddel iyo Caddaalad
U codee Xisbiga UCID